


# *QAAMUUSKA MURTIDA*



*Waxa qorey*
*Maxamed Xuseen Hadi*
*Ottawa, Kanada*
*May 01, 1996*

875

56-A-275

# *QAAMUUSKA MURTIDA*

*Waxa qorey*
*Maxamed Xuseen Hadi*
*Ottawa, Kanada*
*May 01, 1996*

*Copyright © 1996 By Mohamed H. Hadi*

*ALL RIGHTS RESERVED*

*No part of this Book "QAAMUSKA MURTIDA" may be reproduced in any form or by means, electronic or mechanical, including photocopying, recording, or by any information storage and retrieval system, without written permission from the copyright owner.*

*All questions and comments should be directed to:*

*Mohamed Hussein Hadi*
*Somali Resource & Heritage Centre*
*1719 Bank St. Suite 301C*
*Ottawa, On. K1V 7Z4*
*CANADA*

*TEL: (613) 733-1463*
*FAX: (613) 733-3956*

*FIRST EDITION*

# *QAAMUUSKA MURTIDA*

## *WAXAA KU DHAN MURTIDII MAANSO-RUUGA SOOMAALIYEED*

*Waxa Qoray*
*Maxamed Xuseen Hadi*
*May 1996*

*Waxa daabacday:*
*SOMALI HERITAGE FOUNDATION*
*1719 BANK STREET. SUITE 301C*
*OTTAWA, ONTARIO. K1V 7Z4*

UNIVERSITA' DEGLI STUDI ROMA TRE ★ DIPARTIMENTO DI LINGUISTICA

Universita' Roma Tre
Dipartimento di Linguistica
ROMA TRE
INV. N. 3508

# QAAMUUSKA MURTIDA

" SEBEN TEGEY MID WELI SOO SOCDIYO, SAAKA WAXA JOOGA.
SADDEXDAA WAQTAA XAAL ADDUUN LAGU SIFEEYAAYE.
SOO NOQDANA MA LEH, SHALAY WIXII SAADDUFEE TEGAYE.
SAADAMBE IYO BERRINA WAA SAD KAA MAQANE
WAXAY TALADU KUU SUUBBAN TAHAY SUBAXAAD JOOGTAAYE".

NIN DHADHAMIYEYOW CILMI MA WAXA LAGA DHARGAABAA,
NIMAY GAAJO DHUGATOOW HURDO MA WAX LOO DHAWAADAA???

TUSMADA BUUGGA


1. GOGOLDHIG & ARAR GUUD
2. Ereyo & Macnahooda 1
3. Gobanimo (Maxamed Ismaaciil " Barkhad Cas) 9
4. Aan ooyee albaabka ii xidha ( M.I. Barkhad Cas) 10
5. Gelbis (Cali Xasan "Banfas") 12
6. Hawd iyo Callaydh (Cabdi Qays) 21
7. Adduunyooy Xaalkaa Ba' (Cabdi Qays) 23
8. Aakhirooy Xageebaad naga Jirtaa (Cabdi Qays) 25
9. Silsiladii Siinley, Saxarla (Cabdi Qays) 26
10. Saxan Saxo ma Roobaa (Maxamed I. Hadraawi) 28
11. Inkastoo Safar tahay Adduunyadu (Cabdi Qays) 31
12. Waa Saxarla Sheekadu (Cabdi Qays) 34
13. Hooyo (M.I.Warsame "Hadraawi) 36
14. Geed iyo Ruux (Maxamed Cumer "Huryo) 40
15. Geelaa (Cabdalla Maxamed Sagsaag) 41
16. Seyla (Xasan Xaaji "Ganay) 42
17. Madaxbanaanidii Ummadda Som. (Cabdillaahi Timacadde) 45
18. Maandeeq (Cabdillaahi Suldaan Timacadde) 48
19. Heesta Waraabinta Geela 49
20. Damaq iyo Xusuus (Maxamed X.Dhamac "Gaariye) 52
21. Ammaan Dumer (Maxamed I. Warsame"Hadraawi) 53
22. Bulsho (Maxamed I. Warsame"Hadraawi) 54
23. Kibir (Ugaas Nuur) 57
24. Allahayow Nin ii Daran (Ugaas Nuur) 58
25. Ammaan Faras (Cali Bucul) 59
26. Dab Dhaxmooday (Xasan Sheekh Muumin) 62
27. Isma Oga (Ismaaciil Mire) 64
28. Ragow Kibirka waa lagu Kufaaye kaa ha la ogaado 65
29. Mahadho (Xaaji Aadan Axmed "Afqalooc) 67
30. Gar Darrow (Dhoodaan) 69
31. Deelleydu waa Kow (Maxamed X. Dhamac"Gaariye) 70
32. Sinnaan (Saahid Qammaan) 72
33. Tanaa nooga sii Daran (Cabdulqaadir Xirsi Yam Yam) 74
34. Jiinley (Cabdulqaadir Xirsi Yam Yam) 78
35. Waa Cajabe Sheega? (Xaaji Gooni) 81
36. Magacaagu yuu noqon (Ibraahim Gadhle) 83
37. Saadaal (Axmed I. Diiriye "Qaasim) 84
38. Haddii Dunida lagu Waaro (Yuusuf Cabdulle Muuse) 85
39. Qadhaadh iyo Macaan (Axmed I.Diiriye "Qaasim) 86
40. Reerkii Ceel Uma Qodna (Amed-nuur Yuusuf) 87
41. Suugaanta Soomaalida 89

## GOGOLDHIG

Mahad oo dhan waxaa iska leh Ilaahay (Subxaanu wa tacaalaa) oo ii oggolaaday inaan qoro buuggan aan ugu magac daray QAAMUUSKA MURTIDA.

Sida la wada ogsoon yahay, ummad kasta oo af dhaqan iyo hidde wadaagta, waxay leedahay tariikh iyo dhaqan asal u ah oo ay ku muujiso murti iyo sugaan u gaar ah oo ay ku faanto.
Hal-abuurayaasha dejiya suugaantaasna waxaa la og yahay iney dowr weyn ka cayaaraan isuduwidda, kicinta iyo hor-u-marinta ummaddaas.
Abwaaniinta Soomaaliyeed waxay ka mid yihiin qaamuuska ka tarjumaya taariikhda Soomaalida iyo marxaladaha ay soo mareen, taasna waxaad ku arki doontaan maansooyinka ku xusan buuggan.

Qaamuuska murtida, wuxuu ka kooban yahay maansooyin aad u qiimo badan, oo muujinaya taariikhdii weyneyd ee halgankii ummadda Soomaaliyeed, waqtigii gumeysiga ama waqtiyadii ka dambeeyey. Waxa kale oo ay ku tusaysaa heerka sare ee ay aftahmada, xikmadda iyo murtida ay ka taagnaayeen abwaanada Soomaaliyeed iyo sida ay ugu xeel dheeraayeen wadciga siyaasadeed ee wadankoodu hadba marayey.

Hadaba, qof kasta oo jecel in uu wax ka barto taariikh suugaaneedka wadankiisa hooyo ee Soomaaliya, waxaan talo ahaan ugu soo jeedinayaa in uu ka faaideysto qaamuuska murtida oo aan ku rajo weynahay in uu baahi kasta ka haqab tiri karo. Ma filayo inuu kaamil yeelayo suugaanta ummaddeena, hasayeeshee waxaan halkan ku soo uruuriyey sugaan aan filayo iney xul munaasib ah noqon karto.

Waxaan mahad aan la qiyaasi karin u gubinayaa, dhammaan waalaalaha igu dhiiri geliyey inaan diyaariyu buuggan qiimaha badan, ee aan rajeynayo inuu hoggaan waxbarasho uu u nuqdo, faca soo koraya ee Soomaaliyeed ee ku sugan qaaraddan Waqooyiga Ameerika.

Maxamed Xuseen Hadi

## ARAR GUUD

Afka Soomaaligu waa af-ballaaran, ereyadiisuna waa badan yihiin, dhan loo eegaba hadal iyo hawraar, maanso iyo maahmmah, gabay iyo geeraar, masafo iyo madaddaalo, hees iyo heello, sheeko iyo shararraaxin, qorriin iyo qun-u-hadal, gees loo dayaba waa af hodan ah, murti iyo macaan ka buuxaan, qoto-dheeri iyo qaayana Ebbe weyne u yeelay, dadka ku hadlaana ku kalsoon yihiin, dantooda iyo waxay doonayaanna ku sheegan karaan.

Eray walba oo erayadiisa ka mid ihi wuxuu leeyahay dhawr eray oo la mid-ah ama la macna ah. Eray walba waxa ka abuurma dhawr eray oo kale. Af-Soomaaligu wuxuu ka mid yahay afafka geeska Afrika lagag hadlo, welina run ahaan looma oga afafka uu la bah yahay, waxayse leeyihiin culumada afafka ku xeel dheer wuxuu ka mid yahay afafka reer xaam gaar ahaan "Kuush". Xiriir dheerna wuxuu la leeyahay afka gaallaha.

Inkastoo af-Soomaaliga aan dhab loo baarin lama oga taariikhdii maansada la bilaabay gaar ahaan gabayga, oday ma sheegin, wiilna aabihii kama werin. Hadaba ninkii yiraahda, "Waagaas baa gabayga la bilaabay ama nin hebel baa bilaabay ama ugu horeeyey" been buu sheegay. Waxaa hubaal ah haddaynu dhab ugu fiirsanno dhismaha guud ee hadalka ama maansada xeerka loo mariyo ama habka iyo hannaanka gabaygu u dhisan yahay iyo sida qof waliba u yaqaan waddada loo maro sida deelqaafka iyo laaxinka looga ilaaliyo waxaad garan kartaa inuu fil weyn yahay oo taariikh dheer soo maray.

Guud ahaan Af-Soomaaligu wuxuu u kala baxaa hadal iyo murti:

1. **Hadal** waa ereyada qayaxan oo aan taxnayn, jiib iyo luuq midna aan lahayn, warkana laysugu tebiyo.

2. **Murtina** waa erayo taxan oo jiib iyo luuq leh, deelqaaf oo laaxinna aan lahayn, warkana laysugu tebiyo.

Murtidu waxay u kala baxdaa maanso iyo hees: Heesku wuxuu u kala baxaa laba qaybood:

1. Hees Hawleed
   Waa heeska lagu qabto hawsha, ha ahaato hawl xooleed ama hawl farsamo.

2. *Hees Cayaareed*

*Waa heeskii sacab ama jaanta loo tumo ama durbaan loo garaaco oo looga jeedo farax, maaweelo iyo madaddaalo iyo wixii la mid ah.*

*Labadaas qaybood oo aannu soo sheegney haddii la falaanqeeyo mid waliba wuxuu noqonayaa bad aan xeeb lahayn, berri aan laga hoyan karin iyo biyo aan laga bixi karin.*

*Qaybta maansada iyo wixii la xiriira haddaynu u dhabbagalno maansadu waxay u kala baxdaa toddoba(7) qaybood oo kala duwan, kuwaas oo ah:-*

1. *Gabay*
2. *Geeraar*
3. *Masafo*
4. *Jiifto*
5. *Weglo*
6. *Guurow*
7. *& Buraanbur*

*Todobadaas qaybood oo maansadu u kala baxdo waxaa calanka u sida Gabayga. Maansa-ruugyada Soomaaliyeedna waxay sheegeen in sida ay isugu xigaan bay u kala qaaya weyn yihiin. Soomaalidii hore ninka gabayaaga ah iyo gabyguba qaayo weyn iyo qiima badan bay lahaayeen, dadka dhexdiisana xurmo weyn iyo xarragay ku lahaayeen, xulquun & xoolana waa u oggolaayeen, maxaa wacay gabaygu wuxuu ka mid ahaa Ciidanka & Gaashaandhigga dadku ku talogalo.*

*Guud ahaan Af-Soomaaligu murtida iyo maccanka waa ka siman yahay, gabayguna waa ugu horeeyaa, waana ugu hanaaqaadsan yahay, waxaana la moodaa inuu kuwa kale ka qiima weyn yahay. Dadka maansada tiriyaa, gaar ahaan gabayga waa kala hadalla waaweyn yihiin ama hilinka maansada iyo xogta gabayga waa kala heli og yihiin, danta iyo ujeedadana waa kala abbaari og yihiin. La arkee nin gabayaa ahi inuu meel ku fiican yahay meelna ku liito, meelahaasoo ay ka mid yihiin kuwakani:-*

1. *Ammaanta*
2. *Cayda*
3. *Faanka*
4. *Digashada*
5. *Dirdiraha*
6. *Calaacalka*
7. *Guubaabada*
8. *Waanada*
9. *Kuhaanka*
10. *& Xigmadda*

## *RAAD-RAAC*

*Qorista Suugaanta buuggan Qaamuuska Murtida, waxaan raad-raacay:-*

1. *Buuggii Suugaanta Dugsiyada Sare, ee ay qortay Xarunta Horumarinta Manaahiijta ee Wasaaradda Waxbarashada iyo Barbaarinta Soomaaliyeed.*

2. *Cajalad gabay lagaga soo duubay Cali Xasan "Cali-banfas".*

3. *Cajalado uu duubay Cabdi Aadan Xaad "Qays", oo ay ku jiraan maansadii Siinley iyo Heeso kale.*

4. *Cajalado Gabayo, Heeso Qaraami ah iyo heeso caadi ahba.*

5. *Suugaanta Af Soomaaliga ee ku baahsan dadweynaha.*

6. *Ilbaxnimada Awdal iyo Sooyaalka Soomaaliyeed oo uu qoray Sh Cabdiraxmaan Sh. Nuur.*

## *EREYADA IYO MACNAHOODA*

| *EREY* | *MACNAHIISA* |
|---|---|
| *Abaar* | *biyo iyo baan la'aan, xaaluf* |
| *Ababin* | *Korin* |
| *Abbuuriin* | *meel magaceed* |
| *Adari* | *magaallo* |
| *Annayo* | *meel magaceed* |
| *Arladii* | *dhulkii* |
| *Awdal* | *magacii hore ee magaalada Seylac* |
| *Baarqab* | *awrka goosha ah ee geel lagu daro* |
| *Badhaadhiyo* | *hodmo, barwaaqeysto* |
| *Balaayir* | *nooc sigaarka ka mid ah* |
| *Ballaysin* | *diyaararow* |
| *Banhadhlaa* | *meel magaceed* |
| *Baranbarshaaleeyey* | *xarxardhan oo quux badan* |
| *Barqo* | *daajinto lo'da ee aroortii* |
| *Bayaayo* | *timo muurugsan, aan la feedhin* |
| *Bidhiiq* | *il, xashiish, dhagax yaryar oo hadhuudhka ku dhex jira* |
| *Bikidhaale* | *nooc sigaarka ka mid ah* |



| | |
|---|---|
| *Bilidhiyo* | *nasiib, ayaan, hoodo* |
| *Bulaale* | *ceel magacii* |
| *Dheg-dheer* | *dadqalato* |
| *Diihaal* | *daal, diif* |
| *Eydin* | *nirig laba jir ah* |
| *Faarso* | *meel magaceed* |
| *Fallaadh* | *saddex meelood meel* |
| *Gaassirow* | *magac nin* |
| *Gaawaha* | *gorof dhiil weyn* |
| *Gabbaati* | *lacagta ama xoolaha la bixiyo marka gabadhala isa siiyo* |
| *Gabe* | *kumafilna, waxba tarayn* |
| *Gabno* | *neefka caanaha yar* |
| *Gadood* | *weyrax, cadhaysan* |
| *Galac* | *walac, dhalaal* |
| *Gallado* | *garaaro, kuugu deeqo* |
| *Gamas* | *waran* |
| *Garowshiinyo* | *is-qancin* |
| *Geli* | *meel boodh badan oo kayn ah* |
| *Geshi* | *deyn* |

| | |
|---|---|
| *Giir* | *midabka barbarta ee lo'da* |
| *Gilgilasho* | *is gungundhin, is lulul* |
| *Giraamaa* | *lagu waareejiyey, daahaa* |
| *Girrid* | *hidde, hibada la kala dhaxlo* |
| *Gob* | *dun wanaaq iyo gobanimo u dhalasho* |
| *Golle-baanistay* | *ardaa ku wasa hadal* |
| *Gooh* | *taah* |
| *Gooshaash* | *socod aayar ah* |
| *Guluf* | *col* |
| *Guurti* | *odayaal, xeer-beegti* |
| *Habaqlu* | *socotada marida ah, ee iska soo dabadhacaysa* |
| *Habrasho* | *tixgelin* |
| *Habtaybaan* | *jaqsiisay baan, naaska siisay* |
| *Hadhuub* | *dhiilk geela lagu liso* |
| *Hagar* | *wax kala hadh, aan u xeel bixin* |
| *Hamuumaa* | *loo hilobo, lagu qamaamo* |
| *Hanaqaado* | *taabogal, mudakar* |
| *Harawa* | *dix magaceed* |
| *Hawaas* | *webi magacii* |



| | |
|---|---|
| *Hawaraarta* | *murtida hadalka* |
| *Haydaar* | *dhibaato daal iyo gaajo ah, socod dheer awgeed* |
| *Heelada* | *hees iyo ciyaar* |
| *Heenseyn* | *diyaarin, iskuduba rid heensaha faraska* |
| *Hengal* | *weer, maro madax dumarku ku xidhaan marka nin koodu dhinto* |
| *Heeti* | *huddi odayaal oo ka arrin dhan kaga wada jira* |
| *Hiddihiis* | *girrid, garashada la kala dhaxlo* |
| *Hilaadshoo* | *sahamiya* |
| *Hillin* | *dow, dariiq, waddo* |
| *Himilada* | *haweysi, hamo* |
| *Horaad* | *naas* |
| *Horohaadlay* | *meel magaceed* |
| *Igadh* | *hal ilmihii ka dhintay, oo maqaar ku irmaan* |
| *Jamatay* | *jelclaatay, u xiistay* |
| *Karuur* | *caano geel oo dhanaan* |
| *Kilkilineyneey* | *dhankaaga ka soo dhalaalayn, ka soo baxayn shaqo* |
| *Korme* | *dibbi weyn oo naaxsan* |
| *Koronkor* | *Haadhuudh, garow* |

| | |
|---|---|
| *ladiwaaye* | *seexan waa, warwar hurdo la'aan keena* |
| *Lexejeclado* | *xoolo jacayl* |
| *Lool* | *dhigaha aqal soomaaliga* |
| *Midiidin* | *awr raray ah, hayin* |
| *milil* | *nabar, qoon, caabaq* |
| *Moodhadh* | *baabuur* |
| *Naqsadaa* | *lafaguraa, (marka aad arrin dhan walba ka soo eego)* |
| *Qalfoof* | *lafo qayaxan , wax madhan* |
| *Qandi* | *kiish* |
| *Quudhsi* | *yaraysi, yasid, lita* |
| *Saadaal* | *sahadin* |
| *Saameeshay* | *buumisay, daf ka slin* |
| *Saar* | *geed saar, xayaab, geed dhirta isku mara* |
| *Sabada* | *duuleed, agtiisa (ceel agtii, reer agtii)* |
| *Sabool* | *caydh* |
| *Saban* | *Marka meel soo eego intaan loo guurin* |
| *Sahay* | *cuntada loo qaato safarka, saadka safarka* |
| *Sako* | *xoolo sadaqo ah oo masaakiinta la siiyo* |
| *Salow* | *dhibaato colaad (dagaal)* |



| | |
|---|---|
| *Saluug* | *diidmo, aan ku qanacsaneyn* |
| *Sam-Sam* | *ceel magcii, biyaha samsamka* |
| *Saxal* | *cudur, jawi xun, calool xumo* |
| *Saxanso* | *naacow qabow oo wanaagsan* |
| *Seel-Seel* | *teel-teel, degmo baahsan* |
| *Seenyoon* | *ri' aan geeso lahayn* |
| *Seylac* | *magaalo taariikh dheer leh magaceed* |
| *Shaal* | *go' shaal ah-(xariir)* |
| *Shamsada* | *cadceeda, qoraxda* |
| *Shidho* | *qalida adhiga si marti loogu sooryeeyo* |
| *Shililalkay* | *kaalin, heer* |
| *Shucab* | *caarada hore, baarka, bul* |
| *sidig* | *hal ilmo aanay dhalin ku irmaan, laba halaad oo ilmo ku wada irmaan, nirigta laba halaad ku wada irmaan* |
| *So'du* | *ceelal beeli ka cabto* |
| *Sogob* | *orgi weyn oo dhufaan ah* |
| *Sollo* | *laba laamood dhexdood* |
| *Soofna* | *foofna, daaq geyn* |
| *Soorts* | *cuntada* |
| *Subulaha* | *meel magaceed* |

| | |
|---|---|
| *Suddeenna* | *kayn jig ah, meel dhir badan, kaynteenna* |
| *Sudhay* | *madhay, soccay, laga guray* |
| *Sumal* | *wanka adhiga lagu daro ee qoodha ah* |
| *Surmo* | *daro, xuurto, luqun ku marid* |
| *Surrada* | *hararo duuban oo cusub* |
| *Suryo* | *guntin xadhig, meel ood ah oo cidhiidh ah* |
| *Unuun* | *kur, qoorta* |
| *Xaaluf* | *abbaar* |
| *Xafiiltan* | *is-hayn, wadahadal adag* |
| *Xanaf* | *afka midida* |
| *Xaradh* | *liid-liid* |
| *Xaas* | *afada iyo carruurta* |
| *Xaasaamid* | *caatoobid; weydoobid* |
| *Xaasaan* | *caato; weyd; macaluul* |
| *Xaashaa* | *xumo ka fog, ka dheer, maya* |
| *Xaawin* | *socod culus,socsho; tegid* |
| *Xaaxi* | *xunbada cad oo mowjadaha badda yeeshaan kolka ay jabaan ama isku dhacaan* |
| *Xabaal* | *godka dadka dhinta lagu aaso* |
| *Xabaalaquf* | *qarandi; saddex suulley* |



| | |
|---|---|
| *Xabag* | *dheecaan geedaha qaarkood ka yimaada ama laga liso oo kolkii uu neecawda dareemo is-qabsada* |
| *Xabxab* | *qare* |
| *Xulad* | *hal magaceed (geel)* |
| *Xuuralcayn* | *gabdho jannada ka nool* |
| *Yacyacood* | *(miiraha) aan weli dhab u bislaan* |
| *Yagleel* | *xero ama deyr ka samaysan ood khafiif ah* |
| *Yaqiinsi* | *rumeysi* |
| *Yarad* | *xoola laga bixiyo gabadha marka la guursado, ee la siiyo reerka ay gabadhu ka dhalatay* |
| *Yasid* | *quursasho, tixgelin la'aan* |
| *Yix* | *timaha hore oo yaleexa ah oo carruurtu la dhashaan* |
| *Yuuban* | *soo baxsan; yuucan* |
| *Yuxuud* | *duqoobey; dhacay; xuud* |

## *GOBANIMO*

*Gabaygan waxa tiriyey Allaha u naxariistee, Abwaankii la odhan jiray Maxamed Ismaaciil Baasarce, oo ku magac dheeraa "Balaayo-cas", waxaannu ka mid yahay gabayadii faraha badnaa ee uu Maxamed tiriyey 1958 kii, markii Gumeysigii ingiriiska, Soomaaliya(Qaybta Waqooyi) lagala dagaalamayey, waxaannu yidhi:*

*Diintaan ku gabowney baan gambinee,*
*Ayaan cidi guursan gabadheennee,*
*Soomaaliyey giddigiin gartaa naqa oo,*
*Maxaynu gobannimada siinnaa?*

*Hangool iyo gudin gar iyo xadhig,*
*Aqalkaa la galiyo dhuxusha giniga ah,*
*Geedkaa ina deeqay gabigeen,*
*Gadniin Iglan goosan kari maysee,*
*Soomaaliyey giddigiin gartaa naqa oo,*
*Galoolka maxaynu siinnaa?*

*Wuxuu galo iyo wuxuu gudo,*
*Gasiirad kuwaa go'doon ku noqdee,*
*Isguud baxay baa dal garanaayee,*
*Inaan ku gargaarno gaalada iyo,*
*Inaan ka guddoonno Guullahay,*
*Miduun labadaa inoo gooyoo,*
*Soomaaliyey giddigiin gartaa naqa oo,*
*Maxaynu Gayigeenna siinnaa?*



## *AAN OOYEE ALBAABKA II XIDHA*

*Gabaygan waxa tiriyey, Allaha u naxariistee, hal abuurihii waddaniga ahaa, ee la odhan jiray Maxamed Ismaaciil Baasarce, oo ku magac dheeraa "Balaayo-cas", waxaannu gabaygan curiyey 1958 kii, taasoo ahayd mar uu "nin Ingiriis ah oo la odhan jiray Duke of Gloucester, booqasho ku yimid magaaladda Hargeysa ee Waqooyiga Somaliya. Waxay Maxamed saaxiibadii, ka codsadeen, inuu ka soo qayb galo soo dhoweynta ninkaas. Halabuuruhu isagoo diidan in ninkaas la soo dhoweyo, sheegayana xumaanta gumeysiga,wuxuu yidhi:*

*Awowgey ninkii indhaha tiray,*
*Ninkii aabbahay addoonsaday,*
*Ninkii anigana i iibsaday,*
*Ninkii ifka igu adduun tiray,*
*Itaal li'i baa ishaa i bidee,*
*Haddaan ogohoonan ka aarsan karayn,*
*Haddaanan aadanow unuunka jarayn,*
*Ninkaa aragiisa uurkaan ka necbee,*
*Aan ooyee albaabka ii xidha.*

*Isagoo Iglan jooga buu i diloo,*
*Ushuu soo fidshaa i iimeysoo,*
*Waa taa aramidii i oofa tirtee,*
*Asaag li'i baa ishaa i bidee,*
*Ninkaa aragiisa uurkaan ka necbee,*
*Aan ooyee albaabka ii xidha.*

*Arladii ka samroo adduun ma hayee,*
*Haddii la ilaashay afkeygii,*
*Haddaanan ikhtiyaar aqoontay hadlayn,*
*Haddaanan eray qudha shirkaas odhaneyn,*
*Ninkaa aragiisa uurkaan ka necbee,*
*Aan ooyee albaabka ii xidha.*

*Wixii arrineen Illaahay jeclayn,*
*Haddaanan addimada ku oolin karayn,*
*Aayaadka Qur'aan wada aragtoo,*
*Udgoone ina yidhi indhaha ka qarshee,*
*Ninkaa araggiisa uurkaan ka necbee,*
*Aan ooyee albaabka ii xidha.*

*Ugaadha ninkii dhaqee ururshaa,*
*Ruuxii eegayaa adduun ka baxshee,*
*Raggiinnii ogaa horuu u arkee,*
*Ninkii ooridiisa u geynaayow,*
*In Keeg iyo Shaal ayuu ku arkine,*
*Iimowdee axankaaga weynee.*

*Liibaxa Annayiyo abaarso ka ciyey,*
*Abuuriin lo'da joogta baa urisoo,*
*Ooday jebisaa intay ka dhacdoo,*
*Amsaxuu ka guraa idaylkeed,*
*Waakaa Ingiriiskii iida hayee,*
*Idinna u dabbaaldhegoo adhiyohow,*
*Ordoo magacana ka iibsada.*



## GELBIS

*Gabaygan Gelbis waxaa tiriyey hal abuuraha caanka ah, Cali Xasan "Cali Banfas", wuxuu ku saabasan yahay dhaqanka guurka ee Soomaalida. Wuxuu Cali gabaygan tiriyey Sannadkii 1976 kii, waxaannu kaga qayb galay Bandhig suugaaneed, la magac baxay bandhiga fanka iyo suugaanta soomaaliyeed, oo lagu qabtay Xamar, kaasoo uu Cali horyaalnimadii Gabayaanimo ee bandhigaas uu ku guuleystay, kulana magac baxay "Cali Banfas", waxaannu yidhi Cali:*

*Marbaa geedi loo rari,*
*Abaar geli habaasweyne,*
*Mid halkuu gu'gii degay,*
*Midkale dayrta gelayaaye,*
*Dannuun ceel la fuuqsaday,*
*Midkale daba galashaystaaye,*
*Hadba tuu Illah ku gallado,*
*Gabadhi weeyaane,*
*Ninkastaa miduu Gaasirow,*
*Galab la haasaaway,*
*Niyadiisu ay gow ku tidhi,*

*Gooh la ladi waayee.*
*Guurkeenuu waa laba dariiq,*
*Oo is garabyaale,*
*Waa gabadh la qaadiyo,*
*Miday guurti bixisaaye.*
*Guurtidu miday bixineysaa,*
*Geebka loo tegi,*
*Gar cadaawe maahee,*
*Shir waa gogoldhigiisiiye*
*Gadhweyntaba,gadhweyn kale,*
*Ayaa la horgeeyaaye,*
*Golle-baanistay heeti wali,*
*Gaafo hadashaaye,*
*Ooy niman ku geeraarayaa,*
*Gabay ku sheegaan.*

*Geel kagama joogsado,*
*Ninkii caashaqeed galaye,*
*Waayeel gadaal dhowrayaan,*
*Garab ku siineyne.*

*Hadday lexejecladu geestahoo,*
*La is-afgaranwaayo,*
*Ama gabadh ka weyn lagu xidhiyo,*
*Gaban horaan siiyey,*
*Oo gabadhu wey doonantahay,*
*Gawska ku adkeysto,*
*Ama xeer gu'yaal hore taxnaa,*
*Loo gu'tirinaayo,*
*Garta lagu xabaashoo,*
*Halkaa la is-girgirin waayo,*
*Inankii gabiin iyo xannun,*
*Laba gar daymooye,*
*Inantiina goob kale,*
*Ayey gaydha la qabtaye,*
*Kala gurashadoodiyo faqay,*
*Gees ka garataaye,*
*Marka uu waxgaradhkii hadlo,*
*Eey tallo go-aan joogto,*
*Inta gooni loo kala baxaa,*
*la is-gun xaadhaaye,*
*Garowshiinyo la iskula noqdaa,*
*Oo goddab la baajaaye.*

*Soomaali waa gibin ciddii,*
*Dhaqan ku gaadhaaye,*
*Ducadiyo gabaatiga,*
*Markii la isku gacan qaado,*
*Inankii gu-ddoonsady,*
*Xileyn guudka la saarye.*
*Waa gob iyo caadkeed,*
*Iney gabadha hooyaane,*
*Soddohdiina guubaabaday,*
*Dumarka gaadhsiine,*
*God dalooladaa laga jiraa,*



*Gacalku taageerte,*
*Maro goodi dheeriyo,*
*Xariir lagu gadaamaaye,*
*Subaggeenii guunyada,*
*Iniin ugu galaalaane.*
*Gadaal iyo hor baa laga maraa,*
*Labada goonyoode,*
*Gaban loo xanbaarshaa,*
*Oo lagu gardaadshaaye,*
*Gelbis iyo damaamadiye.*
*Aroos loo gimaamadiye.*

*Gjiyaaye middii kale,*
*Ayaan idin garwaaqsiine,*
*Gabadhii la qaadana,*
*Haddaan idin garwaaqsiine,*
*Hadduu guunyo badan waayo,*
*Uu goosan kari waayo,*
*Gidhkigiyo gammaankoo lamadan,*
*Golaha keeneynin,*
*Yaradhkuu ka gabangaabsadaa,*
*Geed-fadhiisiga'e.*

*Kiiyoo Faygamuurtii sitiyo,*
*Laba go'oo maydhan,*
*Dabeed is gaaf'gaafayoo,*
*Ganafka taagaaya,*
*Gaashaanka iyo Tooridiyo,*
*Gamas intuu qaato,*
*Geyiguu ka soo xulan,*
*Miday gobodu saarneyde.*
*Ganaaniyo Galdhuur iyo Nugaal,*
*Aradka Gaaroodi,*
*Gadhka Saylac Geeskaa bariyo,*
*Gaarsiyo faanfan,*
*Haddii aan galbeed ugu rogoon,*
*Herer ku gaadhsiiyo,*
*Gadh ilaa gabaankaa,*
*Ayuu gaadhka soo marine,*

*Haddii guuto loo wada degiyo,*
*Jeesas kala gaar ah,*
*Gabal kama tegaayoo,*
*Dhulkuu galalafaayeeye.*
*Siddii gaada weynow Libaax,*
*Guura bahaleeye.*
*Hadduu gego banaan kula kulmiyo,*
*Garangar hoosteeda,*
*Wuxuu gacanta soo qabanayaa,*
*Timo gammaanleye,*
*Marka ay la garatay dharkiyo,*
*Guran hugeediiye,*
*Gaagaabsi baa loo dusaa,*
*Gaatin-caaraba'e,*
*Cigta jaantabay dhowrayaan,*
*Geelu yuu didine,*
*Geh hadduu yidhaa ruux qufacay,*
*Wey gabanayaane,*
*Muaka giringirtiisiyo hadhkay,*
*Gudub u raacaane,*
*Raadkooda gadayaan,*
*Hadhow yaan la soo gurine,*
*Kayn lada markii laga gudbee,*
*Gadhu kaba duusho,*
*Guclo orod ayaa la holadaa,*
*Amase gooshaashe,*
*Gelin reerka laga jiitaybay,*
*Socod gelaayaane,*
*Geshigaa ninkii lagala tegay,*
*Raacdo waa u geliye,*
*Goor ay noqoto daynbaa ku maqan,*
*Waase gudayaaye.*

*Geli awdan geedo isku baxay,*
*Webiyo gaafkooda,*
*Garbada iyo xeeliga,*
*Yaxaas gacanka soo raacay,*
*Jeertuna gadoodeyso ooy,*
*Gurayso raadkooda,*



*Wiyil gees leh gaatame Biciid,*
*Goray hadaafaaya,*
*Goodir xaradh leh doofaaradoo,*
*Garab ka daaqaaya,*
*Qarandida gucleyneysa ee,*
*Gudub u rooraysa,*
*Gantaashiyo Qodxaanayda dhida,*
*Gaar u fidhimeystay,*
*Coofaadhka gababgaabaaday ee,*
*Guladka buuraaya,*
*Gurdanka iyo qoobkaba,*
*Dhirtoo wada gariireysa,*
*Maroodiga dhex gaardiya iyo,*
*Goosha iyo Aarka,*
*Shabeel giir leh gunofaa dhurwaa,*
*Harimcad guuxaaya,*
*Golli Dacawo weer gaaban iyo,*
*Dhidar gamaameysan,*
*Guduudane cas iyo guluf,*
*Iyo guuto Amayaal ah,*
*Mas gurguurta Good iyo,*
*Abees gulungulcaynaaya,*
*Godka Halaqa Goodaadabiyo,*
*Bahalo guuraaya.*

*Raq geylaansan Haad soo gab yidhi,*
*Gaydhankiyo boodhka,*
*Gorgor kacaya guumeysta iyo,*
*Salamdh geesaas ah,*
*Xuur galuuban geedaha saroo,*
*Guudka kaga joogta.*
*Gocondhada iswadahaystiyo,*
*Mici gabaarayda.*
*Guulaamo roob soo onkoday,*
*Galowga ooyaaya.*
*Gudooduu la soo jiidhayaa,*
*Go'iyo haydaare.*

*Marka lala galbadu bay,*
*Haween galangalcoobaane,*
*Ama kabuhu gooyaan,*
*Ooy socodka gaabshaane,*
*Gaargaariyaan ooy kelayaha,*
*Gacanta saaraane.*

*Gurmad qeylo-doon iyo,*
*Kiiyoo guluf ka yaabaaya,*
*Fulahaa gariiroo yidhaa,*
*Lagugu soo gaadhye,*
*Geesiga si loogala hadhaa,*
*Waa mid soo gudhaye.*
*Haddii galowda warankaad ogeyd,*
*Haanka lagu gooyo,*
*Isan wuxuu galaaftaba,*
*Rag waa is garab-dhigaayaaye.*
*Isagoo gadaa filanaya,*
*Iyo inuu ku guuleysto,*
*Ma gabado'e Faadumo,*
*Ayuu soo hadhgeliyaaye,*
*Gaagaa ku haasaawiyaa,*
*Gaajo yey tabane,*
*Googaa iyo cigalee,*
*Tiiyoo ga'da la baadhaayo,*
*Sheekooyin gaagaaban baa,*
*La isu gelayaaye.*
*Iney gaarinimo leedihiyo,*
*Garasho dheeraad,*
*Geel daaqii hadalkuu u dhigi,*
*Gibila saaraaye,*
*Doqonbaa gandoodee iyana,*
*Wey iska garataaye,*
*Inuu gocon irmaameyn yahay,*
*Iyo geesi hanan doona,*
*Markaasay miduun ugu go'daa,*
*Labada geesoode,*
*Ooy godol ku keentaa hadhow,*
*Ama gabowdaaye,*



*Gabal kale haddii reerihii,*
*Lagu gayoon waayo,*
*Oo uu la sii gudo caways,*
*Qadow gabaahiir ah,*
*Meel garab dhigluu seexiyaa,*
*Gaadhna ka hayaaye,*
*Hadhan ka hayaaye,*
*Gabadhle aan qaadin,*
*Gu'iisuu iskugu laabi,*
*Uu gees ka uumiyiye,*
*Giddi caawadaasoo dhanbuu,*
*Gama'a diidaaye,*
*Hadha waxay gandoodaba,*
*Markay gorada hayn weydo,*
*Gelin dhexe siddii cawshabay,*
*yara gamaartaaye.*
*Makuu soo guduutuu cirkii,*
*gees yar ka iftiimo,*
*yuu gacalo ii toos yidhaa,*
*waagii waa gibine,*
*iyadoon is guunguuninbay,*
*giijin maradiiye,*
*laba gobol dhexda u kale go'duu,*
*farax u guuxaaye,*
*gosha naaska yara muuqatay,*
*buu yara hangoodaaye,*
*xishoodbaa gelaayoo,*
*haddana gacanta laabtaaye,*
*Gumar iyo galool iyo maraa,*
*xididalay gaaban,*
*ama kaynu gaar u niqiin,*
*miduu ka soo gooyo,*
*Cadaybuu gasiin uga dhigaa,*
*galacda waagiiye.*

*Rag jacaylka waa u golongolaa,*
*kuna goldheerowye,*
*go'doon wuxuu la soo maro,*
*haraad gaajo iyo oonba,*

sidii giir lo'aad oo ilmaha,
laga unuun gooyey,
loo sido gondaalkii tiiyoo,
daba gahleyneysa,
isan Goray sidiisii haldhaa,
ganafka taagaaya,
ooy soo gardaadihin ayey,
guul ku soo hoyane,
gaban loogu wehelyeelayaa,
iyo gaban lammaaneeya.
Meherkaa dabeed loo galaa,
lana gorfeeyaaye,
gedii xaawalayday gashaa,
geela badisaaye,
gar cadaadiskaa meel habboon,
lagu gulaalye,
Saamihii guduudnaan jiriyo,
Kebeddu waa gaare,
Gelbis qaayo weynbaa,
aroos loo gimaamadiye,
googoos xariiraa docahaa,
lagu giraamaaye,
gebladiyo ciyaartaa,
firkada lagu garaacaaye,
Toddobaad gedaasaa,
waglada loogu kala goyne.

Marka gool cad lagu joogsadiyo,
Wanan tigaad goosatay,
Gadhka culimadaa loo geshaa,
xeeryo geedo laho,
gawsiininmowliidka oo,
gabagabeeyaana,
Guuleed ayaa loo tegi,
gacaladiisiiye,
oo guulahay loo baryaa,
ubad gragaaraaye.



Siddii Aar gu'yaal badan qadoo,
gaajo kala goysay,
gaadada ka fuuloo barkaday,
Geenyo miraneysa ,
Galalaati waa ridi,
ninkii gaaxsanaan jirye,
Galxoob iyo karuur baa u yaal,
gocay liskeediiye,
ha u galo si wacan hawshabaa,
loo gol leeyahay.
Geeska waa la suubaaniyaa,
gaatiree adage,
galka lagu cidhiidhyey midida,
xanaftu goysaaye,
in haf yidhi gadaankii tolaa,
sow la garan maayo.

*HAWD IYO CALLAYDH*

*Heestan oo ku beegneyd Sannadkii 1967kii, waxaa tiriyey Cabdi Aadan Xaad (Qays) waanna hees Jacayl ah. Heesta oo dhextaalkeedu yahay hawd iyo callaydh waa meel ka mid dhulka hawdka,waana meel aad u wanaagsan oo ah dhulka xooluhu aad ugu dhaqmaan, wuxuu yidhi:*

*Ka hadh baan lahaa,*
*haween iyo jacaylkood,*
*Hore uga mar baan idhi,*
*hiyigaad ka goysee,*
*Marka aan habeen qudha,*
*hurdo nabad u seexdoba,*
*Sow hees walwaaleed,*
*hablo iima qaadaan.*
*Caawana hirkaan degay,*
*ma hawd iyo callaydh baan,*
*Hawlihiyo caashaqa,*
*ma ka gallay halkaygii.*

*Ka hadh baan lahaa,*
*cilmi tuu la hoydoo,*
*Hore uga mar baan idhi,*
*wixii Qays haleeloo,*
*Naftaydaan had iyo jeer,*
*hami laga ag waayine,*
*Sow hees walwaaleed,*
*hablo iima qaadaan,*
*Caawana hirkaan degay,*
*ma hawd iyo callaydh baan,*
*Hawlihiyo caashaqa,*
*ma ka galay halkaygii.*



*Horohaadlay baan idhi,*
*gu'ga aad ka heestide,*
*Banhadhlaa lahaa,*
*hantidaada geeside,*
*Caawana hirkaan degay,*
*ma hawd iyo callaydh baan,*
*Hawlihiyo caashaqa,*
*ma ka galay halkaygii.*

*Higso baan lahaa,*
*qayrkaa waa hayaamee ,*
*Haybi baan lahaa,*
*dantii kaa hallowdee,*
*Markaan hello wax iga maqan,*
*ama aan hatiyo maal,*
*Sow dumarku heesiyo,*
*hayay iima qaadaan,*
*Caawana hirkaan degay,*
*ma hawd iyo callaydh baan,*
*Hawlihiyo caashaqa,*
*ma ka galay halkaygii.*

*ADDUUNYOOY XAALKAA BA'*

*Heestani waxay ka mid ahayd, riwaayad uu curiyey Cabdi Aadan (Qays), waxaanay ku beegneyd Sannadkii 1970kii, heestani wuxuu halabuuruhu u tiriyey Madaxdii Dowladii kowaad ee Soomaalida (1960kii- 1969kii), taasoo uu kaga waramayo xaalka adduunyada iyo maalinba sida ay tahay, waxaannay taabaneysaa sida raggii Dowladda madaxda ka ahaa, maalin qudha talladii iyo xukunkiiba looga wareejiyey, waxaannu yidhi:*

*Kii xaman lahaayow,*
*ama xaasidkaygow,*
*Kaan xalay wanaajee,*
*i xumeeyey maantow,*
*Murtidaydu waa xubin,*
*waa hadal aan soo xulay,*
*Xannuun iyo dardaaran ah,*
*wax u jeed dadow maqal,*
*Xikmad weeye heestuye,*
*xifaalaha adduunyada,*
*Xigsimaha daruurtiyo,*
*marbuu xaysku hooraa,*
*Nimco lagu xusuustaa,*
*adduunyooy, adduunyooy,*

*Marbaa xaaluf iyo boodh,*
*abaar la isku xaaqaa,*
*Dadku xagal wareegaa,*
*xumaataa, xumaataa.*
*Xiddigaa is doorshoo,*
*ninkii xool lahaanjiray,*
*Marbuu xaabka qaata,*
*xigsadaa asaagee.*
*Xoolahaaga oo neggi,*
*marbaad xoor ka mashaa,*
*Xaragadu ku lumisaa,*
*adduunyooy, adduunyooy.*



*Marbaa xaaluf iyo boodh,*
*abaar la isku raajaa,*
*Dadku xagal wareega,*
*xumaataa, xumaataa.*
*Marbaa xaagin iyo guluf,*
*cudur kaa xafaadhaa,*
*Caydh lagu xusuustaa,*
*xumaataa, xumaataa.*
*Xiddigaa isbadalow,*
*adduunyooy, adduunyooy,*

*Ninkii maali jiray xulad,*
*adduunyooy, adduunyooy,*
*Marbuu xayna waayaa,*
*xistigii wax moodaa.*
*Marbaa xil iyo maamuus,*
*magac lagagu xeeraa,*
*Xariir lagugu daahaa,*
*adduunyooy, adduunyooy.*
*Marbaa xoogga bilidiyo,*
*tallo lagaa xayuubshaa,*
*Xurmo beel ahaataa,*
*xumaataa, xumaataa.*
*Wakhtigaa sarrinayoo,*
*adduunyooy, adduunyooy,*
*Marbaa sharafku xaymaa,*
*adduunyooy, adduunyooy,*
*Ninkii laga xishoon jiray,*
*aan ciddiba xaalayn.*

## *AAKHIROOY XAGGEEBAAD NAGA JIRTAA.*

*Heesatan, oo uu Cabdi Aadan qays tiriyey isla Sannadkii 1970kii.Wuxuu ula jeeday maadaama uu Adduunyaba ka heesay inuu Aakhirna dadka xasuusiyo, si dadka heeaha jeceli u dhegeystaan oo ay aakhiro u xusuustaan, waxaanu yidhi:*

*Maalinta xisaabtiyo,*
*xaqa mowdku soo galo,*
*Xabaasha iyo Iilkaan,*
*kugu soo xusuustaa.*
*Xiddigaha Cirkee sare,*
*inaad xubin ka mid tahay,*
*inaad hoos u xulantahay,*
*dhulka xero ku leedahay,*
*maannuu hellin xogtaadee,*
*aakhirooy xaggeebaad naga xigtaa.*

*In la xaabinaayoo,*
*adduunyadu xayirantahay,*
*oon xawd la reebayn,*
*waa xarafka Eebbee,*
*Inaad xuuralcayniyo,*
*janno iyo xareed tahay,*
*dhana xulado naariyo,*
*dhamac iyo dhib uun tahay,*
*xajiyaay ku maqalee,*
*aakhirooy, xaggeebaad naga xigtaa.*

*Inta gabadh xishoodliyo,*
*nin xariir ah kugu maqan,*
*Ama geesi kugu xidhan,*
*xaddi way ka badantee.*
*Inaad xaajo adag iyo,*
*xisaab leeday maqalee,*
*Xumo iyo sammaantood,*
*xaalad ay ku noolyeen,*
*Maannu hellin xogotoodiiyee,*
*aakhirooy xaggeebaad naga xigtaa.*



## *SILSILADII SIINLAY, SAXARLA*

***Heestani oo ah Heestii labaad ee sil-siladii Siinlay la magac baxday, wuxuu Hal-abuure Cabdi Aadan "Qays", uga jawaabayey Maxamed Ibraahim Warsame "Hadraawi", heestiisii ahayd Saxarlaay ha fududaan, isagoo leh gabadhii saxarla ee aad jeclayd hadraawow waxaan kula kulmay Jabuuti, iyadoo nin sare qabo Saxarla waa magac gabdheed waana sarbeeb heestu.***
***Heestan saxarla oo dhextaal-keedu yahay "ha ii soo socone noqo, waxaad soo sidayna celi, aniga waan salfududee" iyo guudahaanba silsilada Siinlay, waa heeso Sarbeeb ah ama maldahan, oo ku lug leh siyaasadii xilligii jahawareerka ee askartu wadanka Soomaaliya ka talineysay, 1969kii ilaa 1990kii. Waxaannu Cabdi Qays oo arrintaa ka hadlayaa yidhi:***

***Ina wallanwalow samir,***
***haweenka isasa seegtee,***
***siddeed nabar adoo qaba,***
***waakaa kii saggaalaad,***
***seedaha ku gooyee,***
***saaxiibkay Hadraawow,***
***maxaan kuu sameeyaa.***
***siinkaa ku jiidhee.***

***Gabadhii ku sidataan,***
***sabadii Jabuutiyo,***
***xeebaha sintoodii,***
***iyadoo nin sare qabo,***
***subax aan ku kullanoo,***
***sababtiina caashaqa,***
***markii aan su'aalay,***
***hadba saaca aan joogaan,***
***tukadaa salaadee,***
***adoo Sabawanaag yaal,***
***ruuxa Seylac kaa jira,***
***looma sacab garaacee,***
***hiddaheenu wuxuu yhay,***
***waxay suuban leedahay,***
***hadba saaca joogaan,***

*tukadaa salaadee,*
*adoo Sabawanaag yaal,*
*ruuxa Seylac kaa jira,*
*looma sacab garaacee,*
*sifaheedu wuxuu yahay,*
*siri way jirtaa kow dhe,*
*samo lama hayee laba dhe,*
*waxay Saxarla kugu tidhi,*
*ninka soo socdoow joog,*
*waxaad soo sidayna celi,*
*anigu waan sal fududee.*

*waxay Suuban leedahay,*
*wax markii la sugi jiray,*
*adduunyadii ka socotee,*
*soorta tii hortaadiyo,*
*sacabkaaga taalaa,*
*sadka ugu wanaagsane,*
*sifaheedu wuxuu yahay,*
*samir wuu dhintee kow dhe,*
*samo uu gabee laba dhe,*
*waxay Saxarli kugu tidhi,*
*ninka soo socdoow joog,*
*waxaad soo sidana celi,*
*anigu waan sal fududee.*

*Waxay Suuaban leedahay,*
*safar meel fog kaa tegay,*
*iyo lama dhowro socotee,*
*waa sabankii beentoo,*
*wacad la isasiiyo,*
*runi wey salguurtee,*
*sifaheedu wuxuu yahay,*
*sabool waan nacee kow dhe,*
*saxal waa madhniye laba dhe,*
*waxay Saxarli kugu tidhi,*
*ninka soo socdoow joog,*
*waxaad soo siddayna celi,*
*anigu waan sal fududee.*



## *SIDDI QABAX*

*Markii uu Cabdi Qays tiriyey heestaa hal ku dhigeedu ahaa, "SAXARLA" ee uu u diray Maxamed Ibraahim Warsame "Hadraawi", ayuu Maxamedna ugu soo jawaabay heestan la yiraahdo "siddi Qabax", oo noqtay heestii saddexaad ee soo gasha sil-silada Siinlayda, waxaannu yidhi:*

*Saaxiibkay Qaysow,*
*marka hore salaan guud,*
*marka xiga sadkaagiyo,*
*waxa aad ku sugantahay,*
*waa inaad na siisaa.*
*Marka xiga silsiladii,*
*murtideedii soocneyd,*
*subciyoo dhameeyoo,*
*sollay oo bisleeyoo,*
*dabadeedna siistoo,*
*saaxiib ma nabadbaa.*

*Summadeedu waxay tahay,*
*roob saaka da'aybaa,*
*sarkadhaban la yimidoo,*
*anna seexan maayee,*
*saaxiib ma nabadbaa.*

*Summadeedu waxay tahay*
*heestaydu waa siin,*
*siddig weeye dihinoo,*
*waxa loo saddexa xamaray,*
*dadka haw sinnaatoo,*
*ruuxii sabooli caanaha ha saydhee,*
*saaxiib ma nabadbaa.*

*Heestaydu waa siin,*
*waa sooryo xididoo,*
*saxar laga ilaashoo,*
*laga sugay bidhiiqoo,*
*la saluugi maayee,*
*saaxiib ma nabadbaa.*

*Summadeedu waxay tahay,*
*saxan saxo ma roobaa,*
*seed geel ma hilibaa,*
*sako adhi ma xoolaa,*
*fardhexaad ma suulbaa,*
*sakaraad ma heesbaa,*
*biyo sare u jeedaa,*
*halka ay sal dhigayaan,*
*sahan raacay weydii.*
*Summadeedu waxay tahay,*
*Cabdiyow Sabeenihii,*
*way sumal xadeenoo,*
*midi hay sisidatee,*
*saddex dhalay warkoodii,*
*waxay saaka joogaan,*
*xogta aan ku siiyee,*
*sarta kaaga jeexee,*
*saaxiib ma nabadbaa.*
*Summadeedu waxay tahay,*
*sheekadu sal fududaan,*
*ama socodka qaarkii,*
*kuma sama falaysoo,*
*Cabdiyow ka saan weyn,*
*saabkaad u goysoo,*
*Guban iyo Saraar bay,*
*suxulada la gaadhoo,*
*sinta waxay ku haysaa,*
*subalaha galbeedkoo,*
*ninka Seylac joogaa,*
*sanqadheeda mooyee,*
*ma yaqaan sirteedee,*
*Orgi sarara weynow,*
*sugoboo dhufaaniyo,*
*mid ay tahay ri'siinyoon,*
*kala saarimaayee,*
*haddii looga sacab tumo,*
*salamihii guracani,*
*salal kama baxaysee*
*ha la boodin seeftee, saaxiib ma nabadbaa.*



*Summadeedu waxay tahay*
*inta waranka sooryaal,*
*samayadii ka maqan tahay,*
*inta laba su'aalood,*
*saakaam dhexyaalii,*
*inaan dunida saabkiyo,*
*laga saaray tiirkoo,*
*qorraxdana siraadkiyo,*
*laga siibin nuurkoo,*
*la afuufin suurkaan,*
*Rabbigey ka sugayaa.*

*Summadeedu waxay tahay,*
*ninka ootay seeraha,*
*Saxarala ku guursaday,*
*hadduu yahay nin sare,*
*aan laga sad qaadayn,*
*saadaasha mooyee,*
*si kalaa ka yeelaa,*
*suurtoobi mayse,*
*aniguna sidaydaba,*
*soddoha rag kale qabo,*
*kuma toobad seegee,*
*Summadeedu waxay tahay,*
*siddiqabax shan maalmood,*
*sahay loogu tallo galay,*
*soddon laguma gaadhee,*
*hadal lama sugnaado e,*
*saaxiibkay Qaysow,*
*waxaad Suubban leedahay,*
*saca faarsa nacayow,*
*sagaal beri adoo qaday*
*Samsam iyo Bulaaluu,*
*saarkaagu kaa hayn,*
*Saxarlaay ma kula tahay,*
*Saxarlaay ma kula tahay.*

## *INKASTOOY SIDEEDABA SAFAR TAHAY ADDUUNYADU*

*Heestay, wuxuu Cabdi Aadan Qays uga jawaabayey Maxamed Ibraahim Warsame "Hadraawi", waxaanay noqotay heestii Afraad ee Maansada Siinlayda, waxaannu Qays yidhi:*

*Saaxiibkay Hadraawow,*
*inkastooy sideedaba,*
*Safar tahay adduunyadu,*
*lagu sugayo dhimashada,*
*Saaka waan ku noolahay,*
*idinkuna sidoo kale,*
*Samo inaad ku waartaan,*
*Saatirkaan baryaayaa.*

*Sargooyee aan dhaafee,*
*murtidii aad soocdee,*
*Siidiqabax u bixisiyo,*
*hellay sadaradeedoo,*
*Saxayoo gu'ddoomaye,*
*waan kulla socdaa garo.*

*Anna subxa aan dheereyn,*
*awrkeenii sulubaan,*
*Surrada iyo Loolkiyo,*
*soo saari dhigahee,*
*qabo yuu ku seegine,*
*sargooyee aan dhaafee,*
*sasabadii dhallaankee,*
*suul cayn iyo Dheg-dheer lee,*
*Markaan qaydka sidaniyo,*
*saban la ina bari jirey,*
*ma runbaa salkeedii,*
*mise sabiga uunbaa,*
*lagu seexin jirey waa,*
*waan kulla socdaa garo.*



*Annse kuba su'aalee,*
*waxay Saxarli tidhiyo,*
*warkuunbaan ku siiyee,*
*hadmaan seefta qaateen,*
*kugu gooyey seedaha,*
*intaan nabarku kugu siqin,*
*ayaan kaa samrinayee,*
*ma anaa toobad seegiyo,*
*Soddoh caashaq kugu idhi,*
*hadmaan saanta weyniyo,*
*sheekada u xidhay saab.*

*Sirweeyee aan dhaafee,*
*waxay Saxarli kugu tidhi,*
*ha ila simin Sac kuu nacay,*
*Samsam iyo Bulaalee,*
*muddadaan ku sugayiyo,*
*Samirkaa badnaadoo,*
*wakhtigaa ila siibtoo,*
*Ina kala sarseeree,*
*waan kula socdaa garo.*

*Saaxiibow haddaad tidhi,*
*seed geel ma hilibaa,*
*hadda saanta kabahaba,*
*ragbaa sabana quutaye,*
*waa su'aal Jawaab lehe,*
*sannadkaas miyaad garan.*

*Suubanow haddad tidhi,*
*sako adhi ma xoolaa,*
*ogobay sabool madhan,*
*soofna way u noqotaa,*
*waa Jawaab Su'aal lehe,*
*ruux sadkiisu madhanyahay,*
*miyaan kii sabeen lehi,*
*sadqadaba ka rooneyn.*

*Samaalow haddad tidhi,*
*sakaraad ma heesbaa,*
*Ogow soodka dhaantada,*
*iyo sallowga taahaba,*
*codkeenaa sameeyoo,*
*midba saacad weeyee,*
*miyey kuu sinaadeen.*
*Sargooyee aan dhaafee,*
*waxaan sugayey sheekada,*
*inaad sare u qaadoo,*
*Sohdintii Hawaasiyo,*
*Iimay la socotee,*
*Subuluhuna waa maxay,*
*suulkaaba gaadhee,*
*waan kula socdaa garo.*
*Ninka sadarka weeyiyo,*
*Suubban waa nin naagtii,*
*sidaan hubana caashaqu,*
*uu kugu samaysmoo,*
*kaa sal guuri maayee,*
*waxba soorta ha u nicin,*
*sakaaraadna ha u noqon,*
*hadaad sabarka diidana,*
*suubaale iyo hadal,*
*saaka kuma heleyside,*
*sida qudha ee aad ku dhaxashaa,*
*ama ay ku sugan tahay,*
*waa adoo u siiqmoo,*
*dhididkana u saydhoo,*
*salla uga dul boodoo,*
*surmi uga badheedhoo,*
*gaajo ugu sahwiyayoo,*
*suxulka ugu rooroo,*
*soodhka iyo bilaawaha,*
*jirkaaga faafaan,*
*adna dhiig ku saydhmiyo,*
*surka inaad wax goysaa,*
*inaad sababto taadaa,*
*sadexayne weeyee,*
*waan kula socdaa garo,*
*midna waa tilmaan suxul,*
*uu sahan kuu sheegee,*
*ninka siduu yahay,*
*suuraduu u dhigan yahay,*
*bal aan ku sifeeyee,*
*waa mid sarara weynoo,*
*seediisu buuxdoo,*
*saaxiibo adag iyo*
*seef iyo itaalloo,*
*sagaal aad cabaystoo,*
*sartagiisa aadmiga,*
*uga gooyey surinkee*
*sidaas weeyee xaajee,*
*maku saabuleysaa?*



## WAA SAXARLA SHEEKADU

*Cabdi Qays ayaa ku soo laabtay sisiladii siinlay isagoo Hadraawi u sheegaya inuu saluugsanyahay, ragga ku soo biiray silsilada oo maansada aan si fiican oo caafimaad qabta ula wadaagayn, taasoo uu sheegay in heerka ay isaga iyo Hadraawi ka heesayaan, aanay la socon, kana qotodheertahay sida ay moodayaan, sarbeebtooduna ay ka heer sarayso. Waxaannu yidhi:*

*Samawade Hadraawow,*
*markaad Saxarla tirisaan,*
*suuban kaaga celiyee,*
*soodkaad ka tidhiyo,*
*maqlay Sadaradaadii,*
*kugumaan salluugin,*
*adna maad sinbiidhin,*
*Gaariyo ma seegin,*
*ogow Cali Saleebaan,*
*isna si xun umuu hadal.*

*Waxseen diiday Saaxiib,*
*safka kula wadaagee,*
*Saciid ugu horeeyee,*
*murtidii sariigee,*
*waxa kiciyey salalkee,*
*ma la socotay Riiraash,*
*surmaseegtaduu dhigay.*
*Afqalloocna muu sugin,*
*marrikaynu soconoo,*
*sarsarbuu ka dhaafaye,*
*nin sagaashan jireyoo,*
*hadal seegay weeyoo,*
*tiisu imu saraysee.*

*Sabi iyo dilaalbaa,*
*sarrifaaye hadalkee,*
*saldhigaygu wxuu yahay,*
*Soomaalida ma caayine,*

*ninkii soo socdaan idhi,*
*dhulkeenaa Samaadiyo,*
*ha ka iman suddeenee,*
*dibaa la isku soogee,*
*sad ka qaado hawshaan,*
*talladii ku siiyeeye,*
*saakana la taagnahay.*
*Samir dhimay haddaan idhi,*
*waqtigoo sirgacbaan,*
*siduu yahay tillmaamaye,*
*kuwa gabayga sirayow,*
*si xun wax u sheegu ma ogtihiin,*
*Sixir wuu ka daranyahay,*
*siinlaydii waxaa dilay,*
*Sebigiyo dhallaankiyo,*
*soco baradka heestuba,*
*saaka ugu horeysee,*
*surrinkii hadraawiyo,*
*suryadaan anigu maray,*
*suxul baa u aasaane,*
*sidaa ma ogsoontiin.*
*Saboolkaan tillmaamiyo,*
*halku saxalku yaalana,*
*taa miyaad la socotaan,*
*kuwa salalka kiciyo,*
*si xun wax sheegu ma ogtiin,*
*Sixir wuu ka daranyoo,*
*waa sida habkiinee.*
*Waa sooryo maansadu,*
*samo lagu wadaagee,*
*sun ninkii ku darayow,*
*aday sabobi taadee,*
*saxal maaha gabayguye,*
*saqda dhexe u toosiyo,*
*saacoo looga faashiyo,*
*sahan buu ku xidhanyahay,*
*waa saxarla sheekadu,*
*suuban iyo Jacaylkee,*
*Idinkaa sawirayee.*



*HOOYO*

*Heestan hooyo, waxaa tiriyey halabuure Maxamed Ibraahim Warsame "Hadraawi", waxaannu kaga hadlayaa qiimaha hooyada iyo kaalinta muhiimka ah ee ay hooyadu kaga jirto bulshada, waxaanu yidhi:*

*Hooyooy la'aantaa,*
*Adduunyadu hubaashii,*
*Habeen kama baxdeenoo.*
*Iftiin lama heleenoo,*
*dadku uma hayaameen,*
*dayax heega joogoo,*
*Sida haad ma fuuleen,*
*xiddig hoos ka lulatee,*
*Hawo laguma gaadheen,*
*hubka laguma tuureen,*
*cirka hirar ka muuqdoo.*
*Ruuxaad hageysiyo,*
*usha midaad u haysaa,*
*hillin toosan weligii,*
*ka habaabi maayee.*

*Hooyooy adoomuhu,*
*halkay maanta joogaan,*
*adigaa u horseedee.*
*Intaad hanad xambaartee,*
*haneedka siisee,*
*horaadada jaqsiisee,*
*habtaybaan xisaabiyo,*
*tiro lagu heleynee.*
*Marka aad nin hiiloo,*
*laga baqo hashiisiyo,*
*halyey nina dhashaabaa,*
*hooyo lagu xasuustaa.*

*Marka aad nin hooloo,*
*marti hagr ka gelinoo,*
*gurgisa habaqlulu,*
*isku soo haleeyoo,*
*hayntiisa hura oo,*
*hor Illaahay geystoo,*
*lama hure dhashaabaa,*
*Hooyo lagu xusuustaa.*

*Marka aad nin himilada,*
*hillin tiisan mariyoo,*
*hir markii la gaadhoba,*
*ku labaad hilaadshoo,*
*la hiigsaday dhahaabaa,*
*hooyo lahu xusuustaa.*

*Marka aad nin hoogiyo,*
*ka hortaga dagaalkoo,*
*dabka hura bakhtiiyo,*
*garta hubin yaqaanoo,*
*xaqa hoos u eegoo,*
*halistiyo colaadaha,*
*ku hagoogta dhiigoo,*
*dadka kala hagaajoo,*
*kala haga dhashaabaa,*
*hooyo lagu xusuustaa.*

*Markaad hoobal caanoo,*
*sacabkiyo heelada,*
*labadaba hagaajoo,*
*hiddihiis farshaxaniyo,*
*hab dhaca iyo luuqdaba,*
*Rabi hibo u siiyoo,*
*hawraata maansada,*
*heenseyn yaqaanoo,*
*halabuur dhashaabaa*
*hooyo lagu xusuustaa.*



*Dumar iyo haweenbaa,*
*nolo lagu haweystaa,*
*kuwa lagu hamiyayee,*
*sida hawd caleen weyn,*
*rag u wada hamuumaa,*
*ishu halacsaneysaa,*
*hablahaaga weeyee,*
*Marka guur la haybshee,*
*gadadh heego dheeroo,*
*hoobaan la moodoo,*
*kartiyo hubqaadloo,*
*quruxdana ka hodanoo,*
*hufan laga aroosaa,*
*hooyo lagu xusuustaa.*

*Hooyooy la'aantaa,*
*higaad lama barteennoo,*
*hooyooy la'aantaa,*
*hadal lama kareenoo,*
*ruux aanad habinoo,*
*kolba aanad heesiyo,*
*hoobey ku sabinoo,*
*hawshaada waayaa,*
*hanaqaadi maayee.*

*Hooyooy dushaadaa,*
*dugsi lama heleenoo,*
*hooyooy dhabtaada,*
*hurdo lagu gamaayoo,*
*hooyooy dushaadaa,*
*nabad lagu helaayoo,*
*waxa lagu halmaalaa,*
*hooyo ababintaadee,*
*hayin lagu badhaadhiyo,*

*hogal lagu qaboobaay,*
*hidde lagu arrooraay.*
*Inta hooyo nooshahay,*
*hambalyiyo salaanbaan,*
*hanti kaaga dhigayaa,*
*habarshiyo xaqdhowrbaan,*
*dusha kaa huwinayaa.*

*Hooyo dhimashadaaduna,*
*hoogeyga weeyoo,*
*weligay hogaagaan,*
*ka dul heesayaayoo,*
*hiyiga iyo laabtaan,*
*ku haynayaayoo,*
*hengalbaan u xidhayaa,*
*inta haadda duushiyo,*
*gedi habardugaagee,*
*ifka hibo ku noolow,*
*aakhiro halkii roon,*
*hooyo aakhiro halkii roon.*
*Aamiin, Aamiin.*



## *GEED IYO RUUX*

*Hesstan waxaa tiriyey, abwaankii la odhan jiray Allaha u naxariistee Maxamed Cumar Huryo, waxannu abwaanku sifeynayaa wanaaga iyo quruxda, dabeecada, oo uu si hufan u sifeynayo, waxaanu ku ammaanayaa gabadh, waxaanu yidhi:*

*Geed iyo ruux markayni kala garanoo,*
*Qorraxdoo gees kastaba fallaadho gantay,*
*Yaad geddeedi tahoon lagaa garan.*

*Daruur goor barqo ah ku guud timid,*
*Intay biyo gelisay kala guratay,*
*Yaad geddeedii tahoo lagaa garan.*

*Gugoo da'ay geedahoo baxay,*
*Gelgelimo xareed ah oo galacloo,*
*Garaarale baan lagaa garan.*

*Goor fiida godkeeda jeex la gashay,*
*Guduudka sagalkee u gaarka ah,*
*Yaad geddeedii tahoon lagaa garan.*

*Dayaxoo goor caweysin soo guday,*
*Geyigoo nuuray gelin dhexaadkii,*
*Yaad geddeedii tahiin lagaa garan.*

hogal lagu qaboobaay,
hidde lagu arrooraay.
Inta hooyo nooshahay,
hambalyiyo salaanbaan,
hanti kaaga dhigayaa,
habarshiyo xaqdhowrbaan,
dusha kaa huwinayaa.

Hooyo dhimashadaaduna,
hoogeyga weeyoo,
weligay hogaagaan,
ka dul heesayaayoo,
hiyiga iyo laabtaan,
ku haynayaayoo,
hengalbaan u xidhayaa,
inta haadda duushiyo,
gedi habardugaagee,
ifka hibo ku noolow,
aakhiro halkii roon,
hooyo aakhiro halkii roon.
Aamiin, Aamiin.



## GEED IYO RUUX

*Hesstan waxaa tiriyey, abwaankii la odhan jiray Allaha u naxariistee Maxamed Cumar Huryo, waxannu abwaanku sifeynayaa wanaaga iyo quruxda, dabeecada, oo uu si hufan u sifeynayo, waxaanu ku ammaanayaa gabadh, waxaanu yidhi:*

Geed iyo ruux markayni kala garanoo,
Qorraxdoo gees kastaba fallaadho gantay,
Yaad geddeedi tahoon lagaa garan.

Daruur goor barqo ah ku guud timid,
Intay biyo gelisay kala guratay,
Yaad geddeedii tahoo lagaa garan.

Gugoo da'ay geedahoo baxay,
Gelgelimo xareed ah oo galacloo,
Garaarale baan lagaa garan.

Goor fiida godkeeda jeex la gashay,
Guduudka sagalkee u gaarka ah,
Yaad geddeedii tahoon lagaa garan.

Dayaxoo goor caweysin soo guday,
Geyigoo nuuray gelin dhexaadkii,
Yaad geddeedii tahiin lagaa garan.

## *GEELAA*

*Heestan Geelaa markuu dararanyanhay laba nin duugtaa, waxaa tiriyey, Allaha u naxariistee abwaankii la odhan jiray Cabdalla Maxamed "Sagsaag", waxaanu ku sheegayaa qiimaha geelu kaga jiro hantida Soomaalida, iyo waxtarkiisa, waxaannu yidhi:*

*Geelaa markuu dararan yahay,*
*Laba nin duugtaa.*
*Markay diriro hooraan,*
*Geedudhuna da'joogaan,*
*Hala wada irmaan,*
*Kugu diidin nirigtoo,*
*Goddol debecsaanatee,*
*Gabno kuma daryeeshoo,*
*Marti kuuma deeqdoo,*
*Doobbi lagama buuxshee.*
*Dunidoo ah Jiilaal,*
*Marka ay dameeruhu,*
*Ilmahooda diidaan,*
*Isagaa wax daaqaba,*
*Ugu nolo dambeeyee.*
*Diihaalka gaajada,*
*Isagaw u dulqaatoo,*
*Abaar kaaga doogee.*
*Haddii gacal is-daystoo,*
*Waa ul iyo diirkeed,*
*Waxse maalin kala dira,*
*Waa dayr cadkiisee.*
*Baahi qaybiyo gaajada,*
*Waxa lagu daweeyaa,*
*Dambarkiisa weeyee.*
*Marka doog dhammaadee,*
*Dabeylaha xagaagiyo,*
*Lo'du dooxa jiiftee,*
*Dadku wada harraadee.*
*Dirgan waaya socodkee,*
*Dalandool dal kaa dheer,*
*Isagaa deg-deg u tega,*
*socodkana ma daalee.*



## *SEYLA*

*Heestan Seyla waxaa tiriyey, halabuure Xasan Xaaji Cabdillaaahi (Ganay), waxay heestu ku saabsantahay ammaan gabdheed, waxaanu Xasan, gabadhaa ku tilmaamay meel roob gu' aad u helay, oo barwaaqo ah, geeliina dhalay, oo dadku caano iyo nabad ku suganyahay, waxaannu yidhi:*

*Selyoo guyaad badan,*
*soo baxa kaliishii,*
*seel-seelna loo degay,*
*Sannad geelu badi dhalay.*
*Oo sidigtii Laalays,*
*Nirguhu aanay socod baran,*
*reeraha sintoodiyo,*
*Kaymo saar leh loo dhigay.*
*Oo igadh mid yari sabo,*
*maqaar lagu salaaxay,*
*sameeshay gaawaha.*
*Oo baarqab soohani,*
*isagoo ah laba sabar,*
*soofeeyey micidoo,*
*ka sanqadhiyey doobtii.*
*Salaadiina roorsaday,*
*Ugubkii usaniyo,*
*surmo dheer la tiigsaday,*
*saqdii dhexena roob helay,*
*subaxii bariisada,*
*sidoodaan jaleecada,*
*saxansaxo udgoon badan,*
*sanka kuula raacaa.*

*Sange subag idaadiyo,*
*Sumal badhidii lagu shubay,*
*oo sabada ceelkiyo,*
*Sohdu tahay agtiisoo,*
*loogu dhaansho sacabada,*
*oo sud iyo hawd sare,*
*saddex guure daaqoo,*

*wel aan sadyari arag,*
*oo seeto iyo dabar,*
*labadaba ka saahiday,*
*oo salow dagaaliyo,*
*cidi geyn saraayaha,*
*oo sararta naaxdiyo,*
*timihu isku seexdeen,*
*oo seyngargoorkiyo,*
*loo salaaxay guudkoo,*
*saxarkii ka duuliyo,*
*laga maydho siigada,*
*loo saaray kooraha,*
*Cigaalkiina loo sudhay,*
*sarajooga iyo muuq,*
*sankuneefle kelidaa,*
*adaa suuradiisa leh.*

*Sagal gaaxday roob subax,*
*seermaweydo soo guday,*
*waaguna ku sare kacay,*
*sarajoog nin dhererkii,*
*cadceeduna la simantahay,*
*nuurkuna sagoogtiyey,*
*oo waqal sindadabiyo,*
*guulaamo socotiyo,*
*kala socoday dhibicii,*
*oo midab sibaaqiyo,*
*madow suul dhalaal xiga,*
*saddexdaa miduunyahay,*
*qof suureeyey kala garan,*
*oo beel sanaagiyo,*
*ku surmiday saraar godan,*
*saadaalineysoo,*
*sugayaan inuu helo,*
*subaxii bariisadaa,*
*sidoodaan jaleecada,*
*saxansaxo ugdoon badan,*
*sanka kuula raacaa.*



*Dhulku saacu wada gaadh,*
*waannu kala sad roonyee,*
*meel idaha seel u leh,*
*riyaha salool u leh,*
*oo geela saar u leh,*
*oo dirir sagaariyo,*
*sagaal gudcurkuna helay,*
*saga xareedaan,*
*biyuhna sunsumayaan,*
*oo saawasaawiyo,*
*saxal cudur lahaynoo,*
*salka looga degay nabad,*
*oo saraarta dixidiyo,*
*simantahay dareemadu.*
*Oo sabiga caanihii,*
*lagu siiyey golihii,*
*habluhuna sibraariyo,*
*dhiilo saabka loo tolay,*
*sinta bidix ku qaadeen,*
*subaxii bariisada,*
*sidoodaan jaleecadda,*
*saxansaxo ugdoon badan,*
*sanka kuula raacaa.*
*Sanka kuula raacaa.*

## *MADAXABANAANIDII UMMADDA SOOMAALIYEED*

*Halgan dheer oo qadhaadh ayey Ummadda Soomaaliyeed u soo maratay xornimmadeeda. 1960kii bilihii Juun iyo Julay waxa xornimo hantiday labadii Qaybood ee Ingriiska iyo Talyaanigu ay kala gumeysan jireen, kuwaasoo isla markiiba isku darsaday oo sameeyey Jamhuuriyadda Soomaaliya.*

*Cabdullaahi Suldaan, halkii ayuu ka sii waday gabayadiisii uu Soomaali tilmaan iyo bogaadinba ugu soo jeedin jirey. Wuxuuna Timacadde ku bilaabay Geeraarkiisii caanka noqday oo calanka Soomaaliyeed u noqday haybad abidkii ku ladhnaata.*

## *KAANA SIIB, KANNA SAAR*

*25kii Juun ayaa la isugu soo baxay fagaaraha kubbada Cagta ee Magaalada Hargeysa halkaas oo madax iyo dadweynaba la isugu wada yimid si qofkastaaba uu goob joog ugu ahaado sida labada calan la isku weydaarinayo.*
*Waxa dhinaca Ingiriiska ka socday Mr. Karal oo ay la jiraan madaxdii Soomaliyeed.*
*Roob ayaa tiixay, casarkii gaabnaa ayaa labadii calan la isweydaarshay: kii Soomaalidana waa la saaray kii Ingriiskana waa la dajiyey. Habeennimadii Beerta xorriyadda ayaa la isugu tegay, halkaana waxaa tartan ku dhexmaray abwaanadii Soomaaliyeed ee xagga gabayada. Nasiib daro guddigii garsoorayey Timacadde iyo gabaygiisii waxay siiyeen kaalinta saddexaad. Waxa isweydiin leh gabayadii laga mudneysiiyey gabaygan xaggey ka dhaceen? Taariikhda ayaa maanta garsoortay oo kaana siib, kanna saar ayaynu ka haynaa.*

*Bal aan fiirinno Cabdullaahi Suldaan calanka uga maansoonayay galabtaa Ummadda Soomaaliyeed ku weyneyd. Wuxuu yidhi:*

*Anigoo sebi uun ahoo*
*Sita leeb iyo qaanso oo*
*Siigadoon isku aasiyo*
*Sabo reer ka fogaaninoon*
*La ii aaminin soofkiyo*
*Saacan maanta aan joogno*
*Gabaygu waa ugu sugnaaye*



*Haddii aan sarsarriigo*
*Ama aan surmo seejo*
*Ama aan ka sal guuro*
*Amba laygu saluugo*
*Soomaalida I maqleysaay*
*I su'aala hadhowto.*
---000---
*Ilaahaan waxba seegine*
*Subaciisa Qur'aankiyo*
*Sabbaxooyin ku sheegayow*
*Saciira iyo Naciima*
*Rabbigii kala seerayow*
*Markey suurtu dhawaaqdo e*
*La soo saaro makhluuqa e*
*Shaqiga iyo saciidka*
*Maalintaad kala soocdo*
*Dembigaanu samaynaay*
*Rabbigayow naga saamax!*
---000---
*Subciyayoo ka dukeeyaye*
*Ka sideetan sabaan*
*Calankaanu sugeynayeen*
*Sahankiisa ahaynow*
*Seermaweydo hillaacdayow*
*Sagal maanta darroorayow*
*Siigadii naga maydhayow*
*Saqdhexaanu ahayne*
*Kii soo saaray cadceeddow*
*Aan siduu yahay eegno e*
*Kaana siib kanna saar!*
---000---
*Saahidiinta Islaamka ee*
*Subcisaa Jimcayaashiyo*
*Sibyaanta iyo haweenku*
*Calankay sahadsheenow*
*Cidina kaanay na siine*
*Saatir noogu yaboohayow*
*Saaxirkii kala guurnaye*
*Sarreeyow ma nusqaamow*

*Aan siduu yahay eegno e*
*Kaana siib kanna saar!*
---000---
*Sallaankii Istiqlaalkow*
*Sadadu kay ku xidhnaydow*
*Seyruuqii Afrikaadow*
*Saaxirkii kala guurnaye*
*Sareeyow ma nusqaamow*
*Aan siduu yahay eegno e*
*Kaana siib kanna saar!*
---000---
*San ku neefle dhammaantii*
*Khalqiga kii u sinaaye*
*Mid saaxiib la ahayne*
*Singalkii iska diidayow*
*Saaxirkii kala guurnaye*
*Sarreeyow ma nuqsaamow*
*Aan siduu yahay eegno e*
*Kaana siib kanna saar!*
---000---
*Soomaaloo iscuneysa oo*
*Saqda qaylo dhawaaqdiyo*
*Sulub laysu cabbaystiyo*
*Hadba soof la xabbaadhiyo*
*Sarraayaa demi weyday*
*Kii laydhiisu na saaqday*
*Kii sadqeeyey qabaaile*
*Isu saarray gacmaa e*
*Saf walaala ka yeelayow*
*Saaxirkii kala guurnaye*
*Sarreyow ma nusqaamow*
*Aan siduu yahay eegno e*
*Kaana siib kanna saar!*
---000---



*MAANDEEQ (TIMACADDE):*

*Gabaygan waxa tiriyey Gabayaagii caanka ahaa ee la oran jiray Cabdullaahi Suldaan "Timacadde". Timacadde waxa uu gabaygan tiriyey markii gobannimadii la helay ee isku darkii dhacay. Munaasabadda uu gabaygan ka tiriyey waxa ay ahayd iyada oo Amxaaradu ku hanjabtay in ay gobollada xoroobay weerari doonto, waxa uu yidhi:*

*Gumeysigu hashuu naga dhacay een gurayey raadkeeda*
*Guyaal iyo guyaal badan hashii gama'a noo diidday*
*Goobtay istaagtaba hashan joognay garabkeeda*
*Guuraa habeennimo shaan gebi walba u jiidhay*
*Waxaan soo gucleeyaba hashaan rag isku soo gaadhnay*
*Gaashaandhiggeddii hashaan galowgu eedaamay*
*Hashii geeddankeedii rag badan goodku ku casheeyey*
*Hashaan labada gaalee is-barkani gaydh u diriraysay*
*Gacmaa lagu muquunshee xornimo nooma ay garanne*
*Garre iyo guntane maalintay gees isugu boodday*
*Allaa noo gargaaree markuu shicibku guulaystay*
*Geeraarradii hashaan anigu googooyey*
*Galoolkiyo maraagiyo hashaan kidiga gaylaanshay*
*Gaajiyo haraad badan hashaan ugu garaacaayey*
*Goortuu sidkeedii go'ay eey galabtii fool qaadday*
*Ayadoo candhada giijisay oo godol ku sii daysay*
*Garaad nimaan lahayn bay la tahay waad ka gaagixinne*
*Annagoon gantaalaha dhaciyo haysan qor gaaban*
*Hashaan gaadda waynow libaax uga gabboon waayey*
*Inaan goraya cawl uga tagaa waa wax soo gudhaye.*

### *HEESTA WARAABINTA GEELA*

*Tixahani waxay ka mid yihiin, heesaha loo qaado marka geela la waraabinayo, waa hees hawleed aad u xiiso badan oo ay geel jirahu isticmaalaan:-*

*Shifo ku afsaar,*
*oo shar kuma leh.*

*Markay tubantahay,*
*ama kala taal,*
*waa toleeyoo,*
*looma kala tago.*

*Sida hooyaday,*
*ama habaryartay,*
*ha lagu hadlee,*
*ha lagu heesee,*
*haanlay ma tahay.*

*Markaan maqanahay,*
*ama meel jiro,*
*ama mootanahay,*
*aad meer-meertide,*
*meesha soo gaadh.*

*Horaadkaagiyo,*
*horaadka hablaha,*
*wax la huurshaba,*
*hareer ka iftiin.*

*Geerida haween,*
*guud la feedhiyo,*
*guursi laga qaad.*
*Geeridaadana,*
*gaawe madhaniyo,*
*gaajo laga qaad.*
*Geeridaydana,*
*guryo ba'ayiyo,*
*goblan laga qaad.*



*Geelu, geel fulay,*
*gaadhi maayee,*
*ha ka garab fulo.*

*Afar foolaha,*
*aabbo mooyee,*
*aan af kala baran,*
*abaydimiyaay.*

*Feedha dhiman bay,*
*dhaami leedahay,*
*aan dhabarkiyo,*
*meel dhexaad aan,*
*jeer u dhacay baan,*
*dhawr isleeyahay.*

*Calool weynaa,*
*oo cir badanaa,*
*caska waagiyo,*
*casar badadii,*
*way cabbaysaa.*

*Bila ramadaan,*
*aan raggu afurin,*
*roob u da'a iyo,*
*raaxo doonaay.*

*Maalin hawleed,*
*oo rag kala hadhay,*
*wiil bagoogtaa,*
*waa habaar qabe.*

*Wiil aan garabadu,*
*gurma go'aniyo,*
*geedo nagi noqon,*
*oo gadh kuba marin,*
*miyey geliyeen.*

*Meel xabbada badan,*
*oo xinjiri taal,*
*oo rag ku xarbiyey*
*xayaa ololaay.*

*Wiil aroosoo,*
*uunsi loo shiday,*
*kuma oon tiro.*

*Jeeruu sacabbadda,*
*sarta kala baxo,*
*amuu sararraha,*
*suuman adag iyo,*
*seedo kala jaro,*
*sidaa kuma tago.*

*Waa tanoo timid,*
*waana teenii,*
*waaana tolmoon,*
*waana tubantahay.*

*Cagta saaraye,*
*Caalamiinkiyo,*
*Caadilkow sahal.*



## *DAMAQ IYO XUSUUS*

*Gabaygan murtida badan waxa tiriyey Maxamed Xaashi Dhamac "Gaariye", isagoo ka tiraanyoonaya Geeridii marxuum Cabdillaahi Suldaan "Timacadde", wuxuuna yidhi:*

*Xilli weliba deeqdii* — *gammaan waliba xooggii*
*Xog-ogaal tibaaxdii* — *tulid waliba xoorkeed*
*Xero waliba qaadkeed* — *xeerbeegti taagteed*
*Xaajana guddoonkeed* — *dawlis waliba xaabkii*
*Xaabo waa biseylkeed* — *xulad waliba qiiqiis*
*Maanso xarrakadaynteed* — *xigsin ina Suldaan galay*
*Xiisaheeda gaarka ah!*

*Geeriyeey xishoodlaay!* — *xejiyaay fogeeyaay!*
*Xaasha e aftahannimo* — *haddii uu xabaal galay*
*Xeeldheereheedii* — *haddii xawdalaga jaray*
*Abwaankii xiddigin jirey* — *murtidii xag loo dayo*
*Xulashada ahaydiyo* — *xarragada higgaadii*
*Ayaa xarafka hoos dhebi* — *faraskii xiddaysnaa*
*Xakami ayaa sudhi?*

*Codkiisii xarraankiyo* — *ka madhnaa xabeebtee*
*Xuli jirey wadnaaye* — *xadhkihiisa mudanka ah*
*Xadantayn ogaayee* — *wixii xay ah daayoo*
*Xawaalada gilgili jirey* — *xarka sawdkii tiri jirey*
*Geelana xasilin jirey* — *xakab jabay haddtuu yahay*
*Xaaddayda yaa kicin?* — *gabaygii xalaashiyo*
*Dan ku xeeban jirine* — *xaqa sheeg ha joogtee*
*Mabda'aan la xadi jirin* — *xeelli-hadal ku caan baxay*
*Xurmadeedii yaa marin?*

*Xayndaabkii maansada* — *geerida xasaysaay*
*Haddaad jebisay xeerkii* — *anna damaq xusuuseed*
*Adna dan iyo xeeshaa* — *waa xabag cadaadeed!*

## AMMAAN DUMER

*Gabaygan oo ka tirsanaa silsilad la oran jiray "SIRTA NOLOSHA" waxaa tiriyey abwaanka Hadraawi. Abwaanku wuxuu la hadlayaa gabdhaha Soomaaliyeed oo dhan isagoo faraya inay dhowraan diintooda, dhaqankooda iyo hiddahooda. Wuxuu ku soo halqabasaday abwaanku gabadh Soomaaliyeed oo markaa la joogtay. Wuxuu kaloo abwaanku tilmaamayaa habalaha dhaqanka ka taga. Wuxuu yiri:*

*"Heedhee Sahraay heedhe, sar daruuran oo maas ah, kabo abu sarmaantii ah, dhacle baarka loo seesay iyo boqor wada siyaakhaysan, tusbax dhowr sagaal laab ah iyo qool sudhnaa dheehan, subeeciyada xidiyo laaf leh adigoo sideedaas hal iyo timaha oo soohan ku darsaday sifaha guudka ama qof kaa sitaa jooga halkaa".*

*Markuu Hadraawi ka hadlay dhaqanka suuban, ayuu arakay qaar dhaqanka ka hadhay, wuxuu yiri:*

*"Hadda sala madhlow gaabi, salow ololka hooy jooji, haku bixi saqalaha waalan ha sariiran waayeelka ha ka nixin hiddaha suubban, Gabdhayohow sidee waaye,ilbaxnimadu saas maaha hadba suuf karkaro maaha sararaha banee maaha ,qorqor suuniyaha maaha dhabanada sibaaq maaha sanka oo la mudo maaha sawir iyo riyaaq maaha sakhrad iyo xashiish maaha kabo sookal dheer maaha suuriyo durduro maaha sidaad doontid yeel maaha Soomaali diid maaha ,dhulka oon ku sidi waayin samadoo la koro maaha ku salliya Rasuulkiina ,salaka dhiga guryaha seexda dharku saadhi qudha maaha sayloni garan maaha iyo sabaran daagiiran mana aha surwaal biid ah sunsun falan sidaha feyda sati fudud salaan sheegan indha suhub afkeeda saarey hadba surin ka sheekeeya sidan iyo si baas yeela eryada saluugoo dhan kuma lihid Sahraay meel wax ku deeq".*

*Amaan dumarna abwaan Hadraawi wuxuu yiri:*

*Marka guudka loo dabo*
*Timaha gedebta loo xiro*
*Tirsadaan gu' qaan gaar*
*Geyaankoodu soo baxo*
*oo geedka loo tago*
*wada hadasho guurtidu*
*laga keeno guuyada.*
*Waa gaari nolol wacan*
*lagu soo gardaadshaaye*
*gobsanaa hablahayagu.*



## BULSHO

*Gabaygan wuxuu Hadraawi tiriyey sannadkii 1981kii. Gabaygu wuxuu mid mid u taabanayaa dhibaatooyinka maanta Soomaalida haysta oo dhowr iyo toban sano ka hor uu abwaanku saadaalinaayey. Wuxuuna digniin cad ka bixiyey sida ay nolasha Soomaalidu ku danbayn doonto haddii aan wax laga baddelin sida ay hawluhu u socdeen waqtigaas. Maansadiina waa tani:-*

| | |
|---|---|
| *Talooy go'aan baydahaa* | *Xujooy tartan dedendedkaa* |
| *Hawooy balaggaa furfuran* | *Sengow dhimay bedelligaa* |
| *Diddow ku sheeg* | *Badeey adigaa muggaa* |
| *Hirkaagiyo baaxaddii* | *Buraashad miyaan ku dhuray* |
| *Ballaadhkiyo mowjaddii* | *Bilaale miyaan dardaray* |
| *Shanta hore bidix lisee* | *Caroog kulul baa balwadey* |
| *Babtiisii baa la naxay* | *Dad baa isu soo bulladay* |
| *Dhankee babbisadu jirtaa* | *Baquhu yuu saaran yahay* |
| *Ninkee boholaha xargaga* | *Balbalo u daboolan tahay?* |
| *Bulshaale wad buu sidaa* | *Bahdoon buu maaggan yahay* |
| *Ul boocuu ugu tukubay* | *Berdaa lagu kala negaa* |
| *Dhexdoodii buu ka baxay* | *Dhammaa beybeysigii* |
| *Ban weyn baa la isku helay* | *Fallaadhuhu gun iyo baar* |
| *Bartii shiishkay hayaan* | *Biciidkuna wuu arkaa* |
| *Xaggeese la beegsadaa* | *Badbaado miyay dhacdaa?* |
| *Belaayadu yaab lahaa* | *Wax bay buun buunisaa* |
| *Nin jeeday bararisaa* | *Shantaana ballaysinkii dheh* |
| *Bulshoy adigaa milga leh* | *Ninkii boojimo ku yidhi* |
| *Shalaad barataannu nidhi* | *Bayluulida haw furfurin* |
| *Bariidana kaama geeyo* | *Ninkii ballankaaga qaaday* |
| *ka baaqday xilkaad u dhiibtay* | *Ka baydhay ujeedadaada* |
| *Ku boobay adoo sabool ah* | *Ku wiirsaday baaba'aaga* |
| *Adoo bogan waayey taada* | *Ninkii u buseelay raaxo* |
| *Huwaday bulbushii Libaaxa* | *Buruudkiyo shaashka qaatay* |
| *U booday cirkaas dusheena* | *Bilkeeday laboontidiisa* |
| *Buurtuu koray waarin mayso* | *Heddiisana baajin mayso* |
| *Kub iyo bawduu ka jabi* | *Shantaana umal fool bashiishtay* |
| *berdaanka xusuusta ii dheh* | *Bulshooy adiga boqraday* |
| *Beerkaaga adaa gogladay* | *Bogeyga adaa huwaday* |
| *Wadnaha adigaa barkaday* | *Bishimaha adigaa furfura* |

*Markii lagu bililiqaysto*
*Ayaan boholyoow gabyaa*
*Bulshooy adigay boqraday*
*Baruudka adaygu xidhay*
*Burjiga adigaa iska leh*
*Dagaalka adaa i baday*
*Dantaada haddaan la bi'in*
*Miyaynu is baran lahayn*
*Baraarkana loo qalqalin*
*Haddaan buro loogu darin*
*Haddaan boqol ruux la korin*
*Haddaan basanbaas ka dhicin*
*Dadkii qabay beri-samaadka*
*Adduunyada baryo loogu tegin*
*Haddaan badar loo kaltamay*
*Basaaata ninkii huwaday*
*Naftiisana been ku furan*
*Haddaan waa kuu beryaa*
*Haddaan berrityo sed maqan*
*Baxnaanadu kugu adkaan*
*Baloolliyo badowyaley*
*Qabiilka haddaan la bilin*
*Haddaan is bahaysigeenna*
*Budh iyo xoog lagu furfurin*
*Bukaanka haddaan la nicin*
*Miyaynu is baran lahayn*
*Billaawuhu dhiig matagin*
*Haddaan baqalyuhu ka lalin*
*Haddaan bahaluhu ku shirin*
*rasaas loo berentensiin*
*Barorta qofkii lahaa*
*Belaayo xijaab ka dhigan*
*Haddaan buntukh loogu talin*
*Nin bayr lihi salow ku gelin*

*Markii baaqaagu yeedho*
*Dareenku baraarugaa*
*Adaa bili igu shakalay*
*Haddaan ahay wiil bir kulul*
*Badheedhka adaa i faray*
*Belaayo haddaanay dhicin*
*Haddaan baradaadu guban*
*Haddaan wanka badhida weyn*
*Ninkii cunay booligaaga*
*Saboolka haddaan la badin*
*Dhulkii beeraha lahaa*
*Bal iyo xaab laga idlayn*
*Haddaan badhax loo shubshubin*
*Barwaaqadu tuugsi noqon*
*Biyaha sixin looga dhigin*
*Badhaadhnay haddaanu oran*
*Miyaynu is furan lahayn*
*Bayuur iyo ummal ku tarin*
*Bushaara lagaaga dhigin*
*Haddaan sida baar caddaa*
*Naftaadu ku ciil belbelin*
*Haddaan boodhka laga tuntumin*
*Is-biirsiga wada-jirkaaga*
*Bartaada haddaan la dhicin*
*Haddaan bogso! lagu daweyn*
*Barbaarta haddaan la layn*
*Ninkii ku bud dhigi lahaa*
*Halyeyga badbaadadaada*
*Haddaan bir ma geydadaada*
*Waraabuhu baan ka dhigan*
*Haddaanu u rogin bil-khayr*
*Wixii hadhay baylahdaada*
*Xanuun lagu barag nuglayn*
*Miyaynu is baran lahayn*



*Basaas iyo oon dartii*
*Haddaan sida bagagidii*
*Bariiso haddaan la qixin*
*Bugaan bugtu gelin Xijaas*
*Hablihii boqorkiyo dhaclaha*
*Haddaan baxsadkooda dheer*
*Haddaan boqorrada Carbeed*
*Kun jeer baryo loogu tegin*
*Haddaan bari ina qalayn*
*Beelaha ageheenna yaal*
*Tukihii baallaha caddaa*
*Bannaanada kaga xeroon*
*Haddaan baga laynna oran*

*Haddaan dhulku baali noqon*
*Banaadir indhuu ka nixin*
*Boqoolkiu is daba taxnaan*
*Badoolka haddaan la yu'an*
*Baftada lagu wada yiqiin*
*Baxreyn laga soo qab qaban*
*Amiirada baalka xidhan*
*Miyaynu is baran lahayn*
*Haddaan bgox ina fantayn*
*Haddaynaan buro ku noqon*
*Adduunyadu baadideenna*
*Boogteenniyo dhaawaceenna*
*Miyaynu is baran lahayn?*

## KIBIRKA

*Ugaas Nuur wuxuu tiriyey gabaygan ka dib markuu dagaal weyni dhex maray laba kooxood oo Soomaali ah sanadkii 1883kii. Ugaasku wuxuu aad isugu taxalujiyey sidii uu uga hor tagi lahaa colaadaasi, hasayeeshee waxaa ka diiday boqorkii kooxda kale oo ku adkaystay dagaalka. Ugaas Nuur oo ka dib loo keenay maydkii boqorkii madaxa adkaa ayaa gabaygan halkaas ka tiriyey, wuxuuna ku bilaabay gabaygiisa:*

*Kaafka gabayga Geediyaw baryahan kowba maan orane*
*Anigoo Kariimkay baryay oo dhamay karuur geel*
*Oo nabad ku kacay buu nafluhu weerar igu keenay*
*Kidkidshaha kibaarkiyo kurbada, kalalax kayrkayrka*
*Karta dhamaca kaarkiyo hamiga kaalufkiyo gayga*
*Kadiskiyo kadaaliga racliga weerka kadalooba*
*Kudka kulul kamayiintiyo haduba way ku kiciyaane*
*Kuman guuto keydkiyo hubkaad lohaasho kooraysay*
*Karkarada wadka iyo halaag ku kulaynaaya*
*Kubkuu kaa jabshaa aadmigii kula karaaya*
*Kormo qooqay oo loqan koraa baarqab koran ismoodaaye*
*Karaahida ka joog malintaan kuula imid kaalka*
*Kohashadii karaamada lahayd kabad lagaa saarye*
*Anaa kuulo kuu xidhi maalintaad lahayd kani-adaygaaga*
*Kibir baa ku qaadoo kaa riday indhaha garaad la'aantaada*
*Kuhaankaad ka soo faashatiyo sixirka kuuskuusan*
*Kadoodkii Inkiiskii iyo kooshinkii kuu baxaa isku kaa rogaye*
*Kalyihii iyo laxaadkii ku hoday laqankii kaa keenay*
*Kalidii labaan ahay kun-ciil uunka kabad gooya*
*Kancaan iyo Nabruud bay hortaa ko'da ka tuureene*
*Adigaana halkaad kuudadiyo geeri bay kuu hor kacayeene*
*Kurus geel kasoofane la'aad iyo timir la kuuskuusay*
*Kurus iyo karuur geel ninkii lagu karaameeyey*
*Kimistiisa inuu aayar cuno sow ma kari waayin*
*Kuudadshahan ku kasbaday waxaa ku soo koobay*
*Dixdii uunku noo wada kulmay ee la iga kari waayay*
*Kablalaxu halkuu dhammaantii kabo la'aan yaacay*



*Kutaanyaba waxay farax lahayd halkay isugu keentay*
*Abiidaba ninkii nagu kama'a kibirna noo keeno ee kaadso lagu waayo*
*Kabba dhiga waan siin jiray iyo kalax dhunkaaleede*
*Kobci nabada oo masiibada ha koolkoolinin*
*Ku waantoobi waydoo lagaa maadin kari waaye*
*Kamun beel adigaba kaskaagaa ku dhigay karinka jiifeede*
*Waar odaygu muu soo kama'ay waa kas aadama ee*
*Kac oo toos dhaha waadigii kibirka waynaaye.*

## ALLAHAYOW NIN II DARAN

*Waxaa kale oo jira gabay kale oo uu Ugaas Nuur kaga hadlayo hufnaanta Siyaasadiisa iyo dibloomaasiyada uu ku maamuli jiray dadkiisa, wuxuuna gabaygiisii ku yidhi:-*

*Allahayow nin ii daran maxaan daafta hore seexshay*

*Nin i daaqsanaayana maxaan daafida u kariyey*

*Jidhku nimaanu doonayn maxaan hadalka deeqsiiyay*

*Ma dagdagee xaajada maxaan ugu dulqaad yeeshay*

*Waji dabacsan daymo aan dareen galin dubaaqiisa*

*Debna furan dabuub uuna ka didin deexashiyo muuso*

*Qosol dibadda yaal oon ka iman dhuunta dacalkeeda*

*Kanaan degay kanaan doorkan biday kani dan baan mooday*

*Waxaa dood kaftan ah sheekada ugu daleeyaaba*

*Dabinkaan u dhigo maalintuu dagalka soo saaro*

*Intiiyoon dawaarka u rogoon xeelada u daadsho*

*Isagoon digniin qabin maxaan kaga dayaansiiyay.*

## AMMAAN FARAS

*Geeraarkan soo socda oo ah ammaan faras waa ka ugu qurux badan inta taariikh la hayo geeraar faras. Cali Bucul oo ahaa abaaduule ciidan ayay ku kulmeen Sayid Maxamed C/lle Xasan meel ka mid ah dhulka Soomaaliyeed ee ay Xabashidu gumeysato. Sayidku wuxuu ku yidhi Cali Bucul, reerka aad ka dhalatay ammaanta fardaha ayay badiyaane waxaan doonayaa inaan maqlo geeraar faras, Cali Bucul ayaa markaas yidhi aniga ayaa kuu tirin.*

*Ina C/lle Xasan wuxuu yidhi haddii aan kaa geeraar fiicnaado waan ku dili, Cali Bucul ayaa ugu jawaabay haddii aad erey aan idhi iga daba tiraahdo anigana warankaygu kaa danbayn mmayo.*

*Cali Bucul markuu marayo erayada "Hal garaadka guntiisiyo, guudkii buu ka cadaadee, ma galool ubax laa", ayuu yidhi wiil daraawiishta ka mid ahaa (Adoogaa la gub; ma anaaba galool ubax leh ammaan ka day is idhi). Geeraarkii oo uu kolba xaraf soo qaadanayana wuxuu yidhi:-*

*Gamaan waa magac guudoo*
*Sanga aan gabanayniyo*
*Magaankii godanaa iyo*
*Geenyadii dhadigayd baa*
*Gabigood ka dhaxaysoo*
*Haybta way isku gartaane*
*Guulwadaw Faraskaygu*
*Haddii aan galadiisiyo*
*Gedihiisa tilmaamo*
*Waa gal maaxanayoo*
*Gaadhi mayno xoggtiisoo*
*Waan ka gaabsanayaaye*
*Rag Allow gaf miyaa?*

*Almis goodiyadeediyo*
*Bulxaar guduunkeediyo*
*Galihii Harawaad iyo*
*Gurays reeraha yaala*
*Galab buu isku maraaye*
*Ma daruur gudgudaa?*



*Gabangoodii abaaroo*
*Dadku guunyo ka quustay*
*Geel buu soo tu'iyaaye*
*Ma gob reero dhacdaa?*

*Goluhuu miranaayay*
*Gurxan dhowrta fogeeyiyo*
*Gooh wayn baa ka baxaayee*
*Ma aar goosan wataa?*

*Golihuu ku xidhnaa*
*Nacab soo gardaraystiyo*
*Gaas laxaadliyo guutiyo*
*Guluf weerar ku qaadiyo*
*Gaada goonya wareegiyo*
*Guhaad buu ka xijaaboo*
*Rugtiisa gaajo ma gaydoo*
*Aad baa loogu gamaaye*
*Ma ganuun nin dhamaa?*

*Gudcur roob gibil saarayoo*
*Gufaacadiisiyo caydhka*
*Naftaydii gilgilayso*
*Tuuga soo gabanaaya*
*Laydhiisuu ka gartaaye*
*Ma guhaan garabdaar loo*
*Faalka guun ku noqdaa?*

*Halgaraadka guntiisiyo*
*Guudka buu ka cadaadee*
*Ma galool ubax laa?*

*Fanku suu u dhibtoobay*
*Ma aroos dhumuc waynoo*
*Duleedkuun dhacandiidoo*
*Dhiinle loo alyaya*

*Tagoogaa dhabbacaada*
*Ma libaax dhalanteedoo*
*Cad geel dhuunyanayaa?*

*Dhasalaalaq ciyaarka*
*Ma dhalaan rugtii joogoo*
*Soo dhaanahaansada uurkoo*
*dhibic roob helay baa?*

*Sayntiisuu ka cisiine*
*Ma sayruuq la ganaa?*

*Afartiisa cagood iyo*
*Cududaa dib u laabiga*
*Ma camoodiga haadoo*
*Samadaa ku carceerayoo*
*Meel casaanle arkaayoo*
*Hoos u caaridayaa?*

*Halka lowgiyo laabtiyo*
*Ladanow badhi dhawrkiyo*
*leemaaduhu iska galeenbaa*
*Landaan loogu gamaaye*
*Ma aroos ladan baa?*

*Helmiyay oo helmiyey oo helmiyey*
*oo ammaantiisii heli waayee*
*Hoosiisow midabkaagu*
*Ma habeenkiyo waagoo*
*Kala haayirayaa?*
@@@@@@@



## DAB DHAXMOODAY

*Heestan oo ku jirtey Riwaayadii Shabeel naagood, waxa tiriyey abwaan Xasan Sheekh Muumin. Waxayna si hufan uga hadlaysaa tilmaanno la daahoo, waxaannu yidhi:*

*Doc kastoo la eegoo*
*Nolosha dunidu waa dabkee*
*Hadduu dabkii dhaxmoodoo*
*Maxaa lagu diiriyaa?*
*Waa tilmaan la daahoo*
*Degdeg kuma habboonee*
*Adoo deggan u fiirsoo*
*Ujeeddadaa i deeqsii!*

*Haddii ruux la doortoo*
*Darajadii la saariyo*
*Xilkii daryeeli waayo*
*Dab dhaxmooday weeyee*
*Waa su'aal da'weynoo*
*Madaxa daalineysee*
*Wixii lagu diirinaayo*
*Dadweynahaa la weydiin*

*Durdurkaa laga cabbaa*
*Biyihii lagu dabbaashaa*
*Hadduu harraad dareemo*
*Darkee laga waraabshaa?*
*Waa tilmaan la daahoo*
*Degdeg kuma habboonee*
*Adoo deggan u fiirsoo*
*Ujeeddadaa i deeqsii!*

*Qofkii duunyo haystee*
*Dahabkana barkanayee*
*Wixiisu deeqi waayaan*
*Durdur oomay weeyee*
*Waa su'aal da'weynoo*
*Madaxa daalineysee*
*Darkii laga waraabin*
*Dadweynahaa la weydiin*

ROMA TRE ★ UNIVERSITÀ DEGLI STUDI
DIPARTIMENTO DI LINGUISTICA

*Qofkii cudur dilaayo*
*Dawadaa bogsiise*
*Haddey dawo bukooto*
*Maxaa lagu dabiibaa?*
*Waa tilmaan la daahoo*
*Degdeg kuma habboonee*
*Adoo deggan u fiirsoo*
*Ujeeddadaa i deeqsii!*

*Dallaa'imada diintiyo*
*Distoorka iyo xeerka*
*Haddii dabool la saaro*
*Dawo bukootay weeyee*
*Waa su'aal da'weynoo*
*Madaxa daalineysee*
*Wixii lagu dabiibi*
*Dadweynahaa la weydiin*

*Subagga dufankiisaa*
*Dadku ku dhaashadaayee*
*Haddu dufan basaaso*
*Xaggee baa dux looga doonaa?*
*Waa tilmaan la daahoo*
*Degdeg kuma habboonee*
*Adoo deggan u fiirsoo*
*Ujeeddadaa i deeqsii!*

*Dhaqanku dugsi weeyaan*
*Dalkiisu uu ku dhaatee*
*Haddii dadkiisu aaso*
*Dufan basaasay weeyee*
*Waa su'aal da'weynoo*
*Madaxa daalineysee*
*Xaggii dux looga dooni*
*Dadweynahaa la weydiin*



## ISMA OGA

*Gabaygan Isma Oga, waxaa tiriyey abwaankii Ismaaciil Mire wuxuuna ku bilaabay:-*

*Isma oga Ismiir iyo ninkii ayro foofsadaye*
*Isma oga arbaha weerka iyo ariga goosmaaye*
*Isma oga waraabaha am! liyo awr la laayacaye*

*Isma oga atoor qadow bartiyo uubta loo qodaye*
*Isma oga nin urugaysan iyo iilka kii dhigaye*
*Isma oga dhillada uunsatiyo awga taa'ibiye*

*Isma oga aqoon xume dhergiyo malag Asraa'iile*
*Isma oga agoon iyo ninkii aabaheed dilaye*
*Isma oga askari qooqan iyo nimaan afbuux siine*

*Isma oga abeer qalabliyo inanka doonaaye*
*Isma oga ugaadh iyo libaax adamiyaystaaye*
*Waxba gabaygu yuu ila ordine waxaan ku soo ooday*
*La illow nin aakhiro tegoo iilka hoos maraye.*

## *RAGOW KIBIRKA WAA LAGU KUFAA KAA HALA OGAADO*

*Inkastoo kalaho ama kabtiyo ama kur dheer fuulo*
*Bad kalluun ku jira kay ku tahay amase koob shaaha*
*Kulligood addoomaha Rabbow qaybshey kibistiiye*
*Nin waliba wixii loo katibay waa la kulansiine*
*Nina inaanu soo korodhsanayn kaa ha la ogaado*
*Kufri iyo Islaam loo collow kasihii hore ee*
*Kaakici wadaadkii jihaadka laguna kaalmeeye*
*Kumanyaal lag wada duub cad buu keenay*
*Beerdhiga e waxase kababkii go'ay waa markuu kadday raggiisiiye*
*Kabaalkiina wuxuu jabay markii kariyey reer khayre*
*Ragow kibirka waa lagu kufaa kaa ha la ogaado.*

*Annaa dunida keligay le buu koofil eersaday*
*Kaskiisaba ma gelin wiil yar baa keebka kuu qabanae*
*Ragow kibirka waa lagu kufaa kaa ha la ogaado*
*Kaysaha adduun ina ammaan kama garaacaaye*
*Ragba kenoo geli buu is yidhi waw koraysaaye*
*Isba kii Asraa'iil ma hadin kamana yaabayne*
*Ragow kibirka waa lagu kufaa kaa ha la ogaado*
*Ninka koob nimca fiiqsadee kadin irmaan maalay*
*In karruurka uu qubo horay kaafka ugu tiile*
*Kuligood reer hagar anaa kiinaha dilaye*
*Kama'a Sugule maantii sidii kuray carruureede*
*Ficil baakacshay naagta waa kala fogaayeen*
*Ragow kibirka waa lagu kufaa kaa ha la ogaado*



*Kuwii Muxumed waal raray hadduu saanta uga kaadsho*
*Kulcad uma diloon oo ciyoon koor ma geliyeene*
*Ragow kibirka waa lagu kufaa kaa ha la ogaado*

*Afxakame karkabaddii u ay kulaykiiye ka danbee*
*Caluu yidhi intuu Kaaha guursadaye*
*Kii kalena kaal weyn u tumay karina waabeeye*
*Kalluun shebeg u yall buu ahaa kcinna shaydaan*
*Ragow kibirka waa lagu kufaa kaa ha la ogaado*

*Kelyo caana galeen baa ninkii kiciyey dheeraaye*
*Cartan dhuurta kooraha markuu kor ugu laalaayey*
*Garaad Faarax dhey iyo karuur kala macaanaaye*
*Misna kala kharaaraa dhunkaal kulankii goobeede*
*Ragow kibirka waa lagu kufaa kaa ha la ogaado*

*Amuuraha ma kaadsado ninkay kedo shidaysaaye*
*Kalaamkuu lahaa ina Galaydh kahay gadaalkiiye*
*Kaarkuba ma joogeen hadduu keeno tuludiiye*
*Baalacal kelyaha kuma jareen kii uu quudhsaday*
*Ragow kibirka waa lagu kufaa ka ha la ogaado*

*Lixda koos ee reer Cali Geree kow iskaga siiyey*
*Kasi waaye wuxu qabaal waana kabataane*

*Ragow kibirka waa lagu kufaa kaa ha la ogaado*
*Nin kuwaa ka dhigan baan arkaa oo kadab u laabnayne*
*Karraamiyo colba le kiish ka buuxsadaye*
*Ka shib dhaha islaamow naftii kii ladnaa gadaye .*

# MA HADHO

Xaaji Aadan Axmed Af-qallooc, wuxuu ahaa nin gabayaa Soomaali ah oo maansa ruug caan ah. Isaga oo ka hadlayaa halaagga iyo ayaan darrada guumeysiga nooc kastaba ha ahaadee, siiba ka Xabashida, Xaaji Aadan wuxuu gabaysiga ku soo shaac bixiyey dambiyada laga siqoodo ee ay ciidamada Xabashidu dalkeena iyo dadkiisaba ka galeen, mana aha eedo uu maqlay ama loo soo wariyey, ee waa uu badankoodba u soo joogay. Waxuu maansada ku bilaabayaa sida ay Xabashida Qarnigii 19aad gumeysigii caddaanka ahaa ula bahoodey si ay Afrika boobkeeda uga qeyb qaadato, saamigii dhulka Soomaalida laga siiyey, iyo silicii iyo saxariirtii ay baddey Soomaalidii ay maqaadiirtu xukunkeeda bahalnimo u soo hoos gelisay. Wuxuu ku bilaabay maansadiisii:-

*Qarnigii siddeed iyo tobnaad sanac xumaantiisa*
*Sideetan iyo dhowr sanno waqtiga saaka laga joogo*
*Oo uu sanacadii qarab arliga sabab la'aan boobay*
*Oo adinka idin siiyey qaar aradka Soomaali*
*Sadcaalka uu Jermaaniya ketegay saaxirkii Menelik*
*Afriiqiya sidii loo dhacaad sabab ahaydeenee*
*Midow oo dhan waxaad ssisateen soriya maalin ehee*
*Sirta naga gasheen baa aheyd sun iyo waabay eh*
*Sina uma qaddarin midabka iyo soohdintii iyo jaar eh*
*Gumeystaha dadkaan ula siineeyn soo degoo yimid ee*
*Wax saayid ah addoonsiga madow kugu sameeyaa ee*
*Xaqqana lagama seexdo oo nin lihi wau sid tiriyaa ee*
*Goortay u soo martaa buu wuxuu sugaayay doontaa*
*Samar iyo Allow maleh sidaad noola dhaqanteen ee*
*Waa mahadho saanqaadka kora lala sugayaa ee*
*Dhiig saafi ah lagu qoray iyo saan biciid adagee*
*Duq kastaba sabiguu dhaluu saa ogow yiri ee*
*Gartayadu xuduud kuma sinna iyo soohdin iyo ijaar eh*
*Waa saamigaad qadateen samankii Baarliin.*

*Sakarashada iyo quudha iyo dilkuba saamaxaad malahee*
*Isticmaarku waa kala sifee kiinu waa suruq*
*Sahayuuniga iyo Suud Afrikiiyo iyo saaqidkii Ismiid ah*
*Saddaxdoo israacbaan faleen waxaad sameyseen ee*



*Seeddi iyo iyo waalidiyo sowjad iyo hooyo kala soocde*
*Qoys keli ah oo seeda wada yaala suldaan amar leh*
*Shiekh saahid ah iyo seen caddaa odey ah*
*soddonku nin u buuxo Iyo haween sida carruurtooda*
*Sidqa habar ah inan seeratey iyo kuwii sagaal jooga*
*ayagoon saxarna dhimin baad dhammaan sibiq u leyseen*
*sarraf yiri amxaar jamac dhan oo wada sujuudaaya*
*saqiirka iyo umulahaad disheen malaha soo qaade.*
*Kun baa subax disheen aamin ah oo seexday oo kacay*
*Seddex boqol kabadan culimadii suuqa herar tiile*
*Iyaga oo salaad dhaxe waxaad gasheen soolkii Dhagax-buur eeh.*
*Samada iyo dhulkaba ciidankii riday sawaariiqda*
*Kma seyrin ruux keliyah oo joogay subaxaasi*
*Sujaacdii Awaare afdam oo sida xun loo laayay*
*Saxariiradii naagahaan weli sasayaa*
*Saqiir iyo kabiir rrer Ashaco oo nabad ku soo hoyday*
*Sardhaday galeen baad qumbulad sun ah kutuurteen eeh*
*Surimada Jigjiga leegadii sida xun loo laayey*
*Surkaad wada jarteen wiilashii timaha soohnaa*
*Saqajaanka beesha iyo guryaha socod xumaaddiina*
*Nin sidaa ku dhaqanteen ogaa waa siqsiqiyaa ee*
*Suldad Xabashiyeed nimay heshaa waa sac kuu taliyee*
*San kuneefle aad is shaabahdaan dunida saarneeynee*
*Saxi maayo axad sheeg is yiri sidaad samayseen.*

## GAR DARROW

*Gabaygan waxaa tiriyey abwaan Dhoodaan oo ka mid ah, abwaanada Soomaaliyeed ee caanka ku ah gabayada Soomaaliyeed ee waqtigan, Gabaygiisa oo ugu magac daray Gardarro wuxuu yiri:*

*Gardarrow wax baad gaysataa goor iyo ayaane*
*Gefkii aad samaysaa batiyo godobaahaahiiye*
*Geshi aan yarayn baad qabtaa jeer lagaa gudo e*
*Waxaad goyso mooyee la waa nimaad gargaartaaye*
*Gurigii barwaaqaysan baad gubi taqaanaaye*
*Oo ruuxaad qarqaaddo wallee guul ma xoogsado e*
*Adiga iyo geeridu dadkii waad gablamiseene*
*Adigoon gadaal uga hadhayn mid iska giijay*
*Qofkii tabartii geeskaa maray wax u qaboobaane*
*Gaad baa u soo hadha kolley ruuxii kaa guda e*
*Adoo gabi ka tuuruu arkaa kii garad xumiye.*

*Guntashada xigtaa waa dagaal how gardaadsado e*
*Nin gabbadayse cadhaan guurta hayn ama gurguurtaaye*
*Gurxanka iyo goobaha intuu gunuunucoo reemo*
*Way iskula kaa ganaa waagii uu ciil gaaxsamay e*
*Goorada intuu kaga dhacoo guudka kaga boodo*
*Oo gadh iyo laab daan qabtoo gudub u soo tuuro*
*Markuu aad u galalaasiyoo dibir gawaan raacsho*
*Oo wali gunaanada yidhaah gaal kastuu yahay e.*

*Guubaabadaadii wataa say ku gorortaaye*
*Kuway gibishu kuu saaran tahay waa gadday mudan e*
*Caqligaad gammuun kala heshiyo gudumadaadiiye*
*Indhahana go' baad kaga xidhaa ood ku gunudaaye*
*Dhagahana gufaad kaga jartaa kuna gamuurtaaye*
*Halkaad geesanaysaaba waa god iyo booraan e*
*Waa kaad gandaalka u siddaa eed u godoshaaye.*



## DEELLEYDU WAA KOW

*Silsiladan la magac baxday Deelleey, awaankii ugu horeeyey ee bilaaba wuxuu Maxamed Xaashi Dhamac " Gaariiye", oo ku furay maansada la magac baxday DUGSI MA LEH QABYAALADI. Waxay tidhi maansadu:*

*Dig dhe' deelka maansada*
*Tix dur iyo daabaca*
*Isku duubni wadareed*
*Ha ka dido shanfuuqluhu*
*Arin waa la digo rogay*
*Doonyihii la raran jiray*
*Markabaa ka daba yimid*
*Cirka haada duushaa*
*Ka duuduubte samadii waxa helay*
*Dayuurado deja baalashii yidhi*
*Daacuunkii firidhkiyo daaniyihii dhaqaalaha*
*Rag duuraa ku soo baxay*
*Kuwa daabka fidiyiyo dablayaasha dhimanow*
*Digtoonaada waa i kane*
*Afartaa docdaa mari darsigeedu waa meel*
*Taariikhda duuga leh waxaan uga hor daabacay*
*Xil damiirku qaadiyo waa faral dushayda ah*
*Qalinkiyo dawaadaa inaan fuliyo i diray*
*Waxan uga dan leeyahay*
*Nin qabyaalad doojow doqoniimo waa cudur*
*Haddii aad dux leedahay bal docdaada uun eeg*
*Inta dumar agooma ah inta darin nin lagu cunay*
*Inta duul qaraf jabay dabac yaa lahaayeey*
*Maxaa degel ku baaba'ay maxaa dhacay umulo-doox*
*Anigaa nin dooriyo anigaa wax dumin kara*
*Maxaa beel ku dubuq tidhi imisaa dugaag qaday*
*Dubaaxdiina loo wadhay darka iyo xareediyo*
*Daaq laysu qoonsaday dirirtiyo colaaduhu*
*Maxay haad dibiriyeen islaan wiilkii laga dilay*
*Dugayeey maxay tidhi*
*Dahab iyo aroos iyo aqal laba daryaale ah*
*Maxaa daaha loo rogay waxaan uga dan leeyahay*

Sumad iyo dirsoociyo qofka duuf ku noolow
Alla doori baad tahay Soomaali waa duud
Dankadhabe ha joogee waa ul iyo diirkeed
Daris iyo tol wada yaal nin dan-laana kala gura
Qabiilkii doraad yiil isticmaarkii baa dumay
Shalay dabo ka naaxiiyo
Dibitaati baa waday maantana dillaaliyo
dibirbaa ku xoogsada waa dabin qarsoodiya
Umaday ku dagayaan boobkay ku dadayaan
Qoloqoladan loo dagay kama dhalan dadweynahay
Raga dacarta huriyaa waa koox duumo ah
Daadihiyaashiyo maamulkay ku duubanyiin
Qaarbaa diktooro ah digriigoodu madhanyay
Qaarbaa durbaano leh oo daacadii jaray
Darna waa hagoogtaan waa daniyo waaweyn
Isku soo dabaaloo waa dabaqad maal jecel
Waxa loo digleeyahay dhididkayga dahabka ah
Sidii loo duudbinlahaa afartaa docdaa mari
Dugsi ma leh qabyaaladi waa dararta baahida
Waa astaanta did u dhaca waa boog dalooshoo
Dadka maanka kaga jira dirxi qudhun ku nooliyo
Waxa fadha nin daalina damqa oo ku joogsada
Balse diradiraalow dabka yaad u sidataa
Yaad daafacaysaa haddii uunka kala dido
Yaa dulinka kaa layn dibjir iyo nin xoolo leh
Danbilaawe iyo tuug docdoc weeyi shicibkuye
Yaad daawo leediin waxan uga danleeyay
Haddaad duulimaad tahay rido waa u meel dayo
Doxoryow abtiriyaa armaad dogobka qiiqale
Darintaad ku hurudiyo dushaaduun ka hurisaa
Afartaa docdaa mari tixdu way dagaal timi
Waa daabad aan biqin ami baa u diirad ah
Durba gumicii koobaad waxay daartay nabarkiyo
Waxa doobta ugu wacan dawadiise may gelin
kuwa ararta daajiyo ragbaan ula danleeyay
Deelleydu waa Kow!



SINNAAN

Gabaygan waxaa tiriyey gabayaa Soomaaliyeed oo la yiraahdo Saahid Qammaan. Ma aha ninkii caanka ahaa Qammaan Bulxan wiilkiisa, lamana hubo xataa inay wax isu yihiin, waxaase loo malaynayaa inay isku degaan ku wada noolaayeen. Saahid Qammaan wuxuu gabaygan ka tiriyey goob ay isugu yimaadeen reer tolkii. Doorasho cod kalsooniyeedna loogu samaynayay boqorkii beesha u Saahid noolaa ka talin lahaa. Waxaa markaa xukunka haystay nin la oran jirey Ugaas Xaashi oo ahaa nin keligii taliye ah, dadkiina far dheeratay ku noqday oo maamulkii majirihii toosnaa ka leexiyey. Saahid isagoo kasoo horjeeda Ugaas Xaashi, lana hadlaya dadkii doorashada sameynayey wuxuu tixdan ku muujinayaa inay lagama maarmaan tahay in a helo is qaddarin iyo in loo garaabo qofka dadaalaya. Haddii kuwaas la waayana in aanay jiraynin aqoonsi iyo tolnimo. Waxa kale oo u gabayaagu tilmaamaya in dulqaadku heer leeyahay haddii uu buux dhaafana aanu qofku waxba dowranayn. Rag gabayaa ayaa dadkii ka soo qayb galay doodda iyo garnaqsiga ka mid ahaa, waxaana raggaa ka mid ahaa: Dubbad Hiirad, Saahid Qammaan, Faarax Nadiif, Qammaan Bulxan iyo Cabdi Xirsi.

Nin maansoolayaashii ka mid ahaa oo weli laysku hayo inuu Dubad Hiirad ahaa iyo Gabay shinni ahaa ayaa dooddii ku bilaabay maanso ay ereyadeedii ka mid ahaayeen:

Doog iyo abaar laydhu ways daba maraysaayee
Haddii doobku buuxsamao inuu daato waw halise
Durbana waa kibraa sado ninkay dacalka saartaaye

Intaa markuu yiri ayaa waxa soo galay Saahid Qammaan oo tiriey gabaygan la magac baxay *SINNAAN* wuxuu yiri:

Dubbadow nin maansaba beryaha maadiyaan ahaye
Way iga madoobayd tan iyo maalintii Sirwe
Manjogooye siduu noogu dhacay maagistii digaye
Hayeeshee haddaan maago waan maamiyaa gabaye

*Murti iyo adaan kugu ogaa miiganaan hadale*
*Iga maqal halaan xalay mirkacay ama la maansooday*
*Hadba waxa mudh soo odhan aduun hal aynu moogayne*
*Waa shir laynugu makalay madaqsigii jaane*
*Maantaba maxay noqon sidii Maxamad laa yaabye*
*Afartaa madkeeyaye sidii macalin mow sheegay*
*Mitan waxaan u naqay wiilasheer maanka la qaaday*
*Hadday sado macaantahay ninkii maadiyaa cuna eh*
*Muuse iyo halkii Cali Tarey mahadin maysaane*
*Nin mudmuday dharkayn hooska maray mudhuxye shaaleeye*
*Miyir waxaad ku weydaan iswaal kuma mahiibtaane*
*Hadday muraqa geeduhu go'aan mulayga jiilaalka*
*Mahwiga ceel haddii loo kacoo maalku ku arooro*
*Waw miilo qayb duul hadday magac wadaagaane*
*Iyadoo maaxdu kuu dagan tahaa maalin la cabaaye*
*Ogoobay madada kii leh baa midigta kaa yaale*
*Magawsina haddaan layga siin miid la dhuranaayo*
*Inaan malab rag kale loo shushubi wax uga miideeyo*
*Oon meesha taaganahay anaan murudna leefaynin*
*Oon waliba mood iyo salaan ula maleegnaado*
*Aan maydhax aan igu xidhnayn maylimo u qaato*
*Saddex magac Allee xaajadaa lay marsiin maayo*
*Ninkii midho yar baa lagu dayaa yaan la ii muhanin*
*Muskii in Afee galay arlada kama miciin moodo*
*Sida koran xiniinyaa la muday uma mareeg qaato*
*Gurigiina maal iyo eagbaa lagu mulaalaaye*
*Muggii weel ma dhaafee Allow mooska yaan jabinin*
*Mitan kalena waa aniga iyo mid iska sheegayga*
*Masow aabahay iyo intaan magan ka soo gaadhay*
*Muslin kuma cabiidsamin walaa madaxa kaa goyne*
*Ragna waxaan ku maamuli aqaan ama ku maamuusi*
*Mase inaan nahay ooy tolnimo meerto noo tahaye*
*Oon waliba kaga miilcadahay miidhse diidaniye*
*Masalaha ninkaan ii goglay midig ma saaraayo*
*Ninka aniga iga maarmi kara uma muraad yeesho*
*Saddex magac Alle xaajadaa lay marsiin maayo*



## *TANAA NOOGA SII DARAN*

*Tanaa nooga sii daran waxaa tiriryey gabaygan Cabdulkaadir Xirsi Yamyam, wuxuuna kaga hadlayaa dhibaatooyinkii laga dhaxlay dagaalka sokeeye ee Soomaaliya ka socda wuxuuna soo baxay 20.5.1990 wuxuuna yiri:*

*Hadba dunida waayaa rogroga degaladeediiye*
*Xilligiyo dabaylaha wadaa daadashoo rare e*
*Doog iyo abaar bays bedela gu' iyo dayrtiise*
*Markay beladu kaa durugsan tahay dadab kalay taale,*
*Barwaaqiyo damaashaad in badan maalay darartiiye*
*Inkastooy dhirtii diiratoo duunyadii marisay*
*Inkastooy ku qoys oo dudda ah wada dagaagsiisay*
*Karti iyo dadaal wada jiraa looga doogsadaye*
*Dad iiman leh anagoo ah buu roobkii noo da'aye*
*Daba dheer Allay lehe tanaa nooga sii darane*
*Dab la shiday colaad dumisay beel dirir madoobaaday*
*Dir fir go'ay derebiyada agoon daadsan iyo mato*
*Dereemadiyo mayd caws ka badan dooxo wada dhiig ah*
*Dunbukhyada rasaastoo codkii demin aqoon waayey*
*Dabradiyo waraabaha dhergiyo dacawadaa heestay*
*Afartiisa dacal geeskayaga dirirta gaashaaman*
*Nabadiyo jacaylkaa durkiyo xiisa demi waayey*
*Shacab kala dambayntii niciyo dawlad talo wayday*
*Dagaalkii labaad iyo colkii galay daraawiishta*
*Dibiriyo jidbaaleba tanaa nooga sii darane*
*Abaar dihatay jilaal daf yiri daarihiyo fookha*
*Albaabkaa bankiga daahyadiyo daaqadaha laabtay*
*Markuu doolarkii laba kun tegay shilina loo dayrshay*
*Digsi qudha markii lagu karsaday boqol kun oo deyn ah*
*Darajiyo nin maaliyo faqiir daasad wada qaatay*
*Daabaqado dhammaantood sinmoo dhega ma diidoobay*
*Darandoori boob iyo dhac iyo dil iyo tuugaysi*
*Dalkoo gebigi wada qiiqayoon duul rabaa jirinin.*
*Daacuun kulay taay mar baa laga dawoobaaye*

*Xaaraame cune nooga daran diifiii dacaye*
*Marka qoon is doorhaa Rabbina dooriyaa badiye*
*Iyagoon aan diin iyo sharci iyo daacad uga jeedin*
*Naagahan aan daboolkiyo wejiga daaha adag saarin*
*Ee duluca kii raba u fura niman la doorsoomay*
*Ee Qur'aanka Eebbiyo dulmiyey diinta magaceeda*
*Ee Rasuulkii loo diray xaqiyo diiday amarkiisa*
*Dulliga abuurmiyo xumaha laysla daawaystay*
*Dambigay wadaaggeen kuwa ducufku maansheeyey*
*Ayaa cadho Illaah oo deg deg a llogu soo diraye*
*Allaylehe tanaa nooga daran kud iyo diihaale*
*Afartaa tobnaad baa la degay degaladeeniiye*
*Haddii aannu daweeyuhu dawayn daba go' weeyaane*
*Cafi iyo daryeel iyo Allaa deeq wayne*
*Hareeraha dabkaa naga bacay beladda duulduushay*
*Kaligii ayaa demin karoo daacad loo yahaye*
*Aan duraanto Eebbaan baryada diidin khayrka lehe*
*Daa'imaw Allahayow addoon daallan baan ahaye*
*Dalkii aan ku noolaa waqtigan samihi loo diidye*
*Dagaallada sokeeyaa ka dhigay buul yar oo dumaye*
*Dariiqyadiyo jidadkii la goo' lamana dayn ruuxe*
*Dad Islaam a dhiigii ayaa lagu ducaystaaye*
*Qalbidaahiriyo way dhinteen wada jir doonkiiye*
*Duddo isxigtiyo dhalashadii laysku dayn waayey*
*Duqawdiyo caruurtii ku lume culimo diinkiiye*
*Eebbow duggaalkiyo nagii laysu dacareeyeh*
*Kala daadanoo waxaanu nahay dab iyo baaruude*
*Eebbow rogaal iyo dabraba nalagu duufduufye*
*Kuma daqanno diintiyo sharciga daairka ahaaye*
*Eebbow waxbaa nagu dul degay duuban oo culuse*
*Eebbow dad qooqoo kibraa kiciyey duufaane*
*Deeqdaad na siisiyo nimcadi daaday dhereggiiye*
*Eebbow dadkaagii ku lume laba dab qiiqoode*
*Dana gaara oo niman wataan qaraxa ka oo duulay*
*Malaayiin dadaa lagu ragoo aan dareen qabine*
*Baqdin iyo cabaa nala dul furay doog iyo abaare*
*Naxdin darartay baa lagu liaa doobigii culanne*
*Rabbow diricyadii naga le'diyo doorar iyo wiil e*



*Habar waliba ka dihatay bay dib ugu ooydaaye*
*Eebbow dad qalatooyin baa dooxday ubadkiiye*
*Kaama ay dahsoonoo adaa dooc walba ogsoone*
*Adaa meehadabacdiyo yaqaan daaqadii furane*
*Adaa dulinku kuu muuqday iyo daqaradiiiiye*
*Dibadda iyo adoo gudaha iyo dayr walbaba jooga*
*Inaad noo danaysaan Rabbow kaa duraansadaye*
*Rabbow dacartii naga buuxday iyo doogihii kece eh*
*Dildilaace nabaradi bukiyo boogihii dula eh*
*Debce seedahaygiyo jirkiyo xididdaydiiye*
*Samirkiyo dulqaadkii qofnimo daalyey oo dimaye*
*Dubbe culusi ruuxuu ku dhaco daamankaa jaba e*
*Eebbow ilkihi daata oo waan dulaaqnahaye*
*Dagaal waxaw ugu khayr daran markay deri coloobaane*
*Eebbow waxaa layku diray waa ul iyo diire*
*Eebbow dullaanu is badnee adigu noo doori*
*Doorkii la rogay kama duwanin saalax diidmadiye*
*Dufaankii nebi Nuux haddaadan dooni naga saarin*
*Eebbow dhulkoo nala dumaa waa dareen culuse*
*Carab dalaf leh kuma aan baryin daacad baan aaye*
*Eebbow ma dayrsanahayee dani waa saane*
*Eebbow dad aann caasi noqon oo daahiraa jiro e*
*Eebbow Saqiir dalandaloo dooc la' baa jira e*
*Weliyaal aan daxakaysan oo diin leh baa jira e*
*Dad karaamo iyo kayr leh ood doorataa jira e*
*Ismudaadka Eebbow kun aan daynin baa jira e*
*Eebbow kun dibintiyo khad ku leh daamankaa jira e*
*Eebbow duqyaal ay ciradu deeb tahaa jira e*
*Dikrigaaga Eebbow kunyaal daa'imaa jira e*
*Kumanyaal aan duugoobin oo duugan baa jira e*
*Eebbow kun deelqaaf dhacay diiddan baa jira e*
*Eebbow kun daakira cirkoo daahan baa jira e*

*Makhluuqaa aan diiwaan geshiyo dooranow Muxamed*
*Eebbow intaasaan dartood kuu diraansadaye*
*Naxariis daryeel caafiyaan kaa dalbanayaaye*
*Eebbow dullaa na habsadee adigu noo doori*
*Isusoo dun Eebbow qalbiga kala dugaaggoobay*
*Eebbow walaalaha I dilay baaji dirirtooda*
*Eebbow dabayl caafimaad mari dammirkooda*
*Eebbow dakano waa balee qari wixii daatay*
*Sidaad diinka qoloftiisa adag haadda uga daahday*
*Eebbow addoon kama dalbane daa'in baan iriye*
*Eebbow wax khayr loo deg deg ah nagu dawee*
*Maanta dad Islaam ah oo saa noqdaa waa damiinimo e*
*Danta cadowga weeyiyo Abraaha digashadiisiiye*
*Kuwii yiri kacbada soo dunshaan deris wadaagnaaye*
*Cid kaloo dib noo eegta iyo duul kalaan jirine*
*Daladdaada Eebbow ku qari ceebtayada daadsan*



## *JIINLEY*

*Jiinley Maansadan wuxuu abwaan Cabdulqaadir Xirsi Yamyam kaga hadlayaa dadkii iyo dalkii Soomaaliyeed ee ku jiray gacanta gumeysiga dhibaatada ay qabeen iyo sidii loo xoreyn lahaa, waxayna soo baxaday bishii Agoosto 13, 1975kii.*

*Indhowaydba jiinleyda gabay waan ka jjifsadaye*
*Uma jeensan beelaha jinnigu jiintinta u rogaye*
*Aan jaleeco waa laxawsi jira waxa igu jiidaaye*
*Dhul jiraban kob aan jimic lahay jaan habaas ah*
*Jaljalool abaariyo kulayl dubaya jiidhkaaga*
*Hoyguu dugaag jeexday iyo meel ay belo joogto*
*Jiriqsiga libaaxiyo dhurwaa jararacdii yeyda*
*Jirabkiyo dhibaatada dadka luqunta loo joojay*
*Jar cabaadka qayla baxdiyo jawda demi wayday*
*Jahanamada cidahaa ku jira ee jannada waayey*
*Dadka cadowgu uma jiir naxee jeedalka u qaaday*
*Jarihiyo dadkaa caynka iyo bayda lagu jiiday*
*Addoonsigu dadkaa uu jabshee juuqda laga dhowro*
*Jimicsiga ma yeelee dadkaa nacabku jeerjeershay*
*Jitaabaddadadkaa looga dhigay hogagga jeexjeexa*
*Afrikada dadkaa aan ku jirin midabba waa jaadde*
*Dadkaa jecel xornimo aan lahayn cid ugu jeeqaaqda*
*Dadkaa joharaddoodii la cunay ee jiraban caawa*
*Jirka da'ay jareerada la helay joofafka hilaacay*
*Tog soo jabay waxaa webi jimbacan gawga sare jooga*
*Ubaxyada dul joogiyo dhirtaa joofku wada laacay*
*Naxariista loo jeelayee aragga soo jiita*
*Dadkaa weli abaar uga jiree juuca ku idlaaday*
*Jiljiladiyo seedaha dadkaa jilicsantii beelay*
*Jeebbada dadkaa lagu xiree jilibku naafoobay*
*Dadkaa qodaxda jiiqjiiqlaha ah dhinac loo jiifshay*
*Jirrabkuu Gurey baday dadkaa haatan laga jeebo*
*Ee jiirta dheer lagu eryee jaanta lagu dheelo*
*Caruurtooda nimankaa la jaray uur ku jirahooda*
*Talaabada dadkaa noo jaree ina jaleecaaya*
*Een cadawga jiiqsaday lahayn cid uga jeemaarta*
*Cidda kaliya eey jirinayaan jaalle way innaga eh*

Halkaan joogno waa laga maqlaa jawda qalada eh
Haddaynaan u jiidh nixin dadkaa jilicsan ee liita
Inuu cadow u jeefaafiyaa waa hal aan jirine
Aan ku jimicsannee maan jihaad jeeniga u qaadno
Afartaa sidii dhane la jilay jaan aan soo shubay dheh
Naxwihii aan kala joojin jiray qaar ka soo jabay dheh
Badweyn laabta jiiftiyo murtidii aan la jooqsaday dheh
Afarta kalena soo jire yaqaan jeeska aan nahay dheh
Jabhaduhu ka badan ciidayada jayna oo kale e
Kun majeestayaaloo fadhiga jalalamle u roora
Kun jibaha ku siqa kuman jinniga jiifka ku eryooda
Kun jaan rogaya iyo kuman jigraha jeeni qaarsanaya
Kun ruuxood ku jiiriyo kumaan cidi u joogaynin
Kun jeex qodaya iyo kuman dhufays jiitinta u riixa
Kun jaajuurka kaaraha qafilan jiita ubucdiisa
Kun culayska jiitiyo cuntada kuman jidiin qaada
Kun rasaasta joojiyo ka rida jeeblanaw orodka
Kun dabayshu aanay joojin karin jaf iyo boodkooda
Kun jibaaxa kaymaha jiqda jeerin iyo qootin
Kun wardoonka lagu jeebay oo shaygi jira keena
Jilibiskiyo abeesada kun cuna kuman aan juuc taaban
Kun jibaada kun buur kala jabshiyo jidadka qaar gooya
Kun qof jooga ruuxiisa jara kumaan la jeedaalin
Jid cad iyo kun weerara halkii cadawgu uu joogo
Jiscinkiyo kun aan rabin biyaha horay u sii jeeda
Kun badweynta jaanka dhex mara uurka kuman jiifa
Maraakiibta joofka ah kun wda heegan kala jaad ah
Kun dabaasha joogjooglaha ah jiif isgu tuura
Kun jilaabta soo daba kalluun jeeanan laga qaato
Kun hawada dayaaraadka jaran jalam ka soo daaya
Kun cir jiidha kun jeegaanta sare caad jawiga saara
Kun jal siiya kii soo jabiyo jiiska luga beela
Kun dawada ninkii jalaf ku dhaco dhiiga baxa jooja
Kun geel jire ah kun yoocada jabsada jidibyo qaar haysta
Jinawgiyo kun caanaha balxada liifka kumam jooja
Kumanyaal uneexada jartoo col u jibaadaaya
Kun jinbaca dhex seediyo kuwaa jiida xariggiisa
Kun wadaan jileeyoo darkii gawga sare jooja
Jabadkiyo kun jidadkiyo yaqaan meesha cidi joogto



Jibaaliyo kun beedhiga oggaa janannadii dhuuntay
Kunkii Koofil soo jaray gacmahee juuq u oran waayey
Kuman jirac ah kun ciil jaray dibnaha kuman aan jeefaafin
Ilaa guban ku soo joogay oo seedu jilifoowday
Kuman geenyo jeedliyo rakuub kuman ku jeeraada
Kun jihaada kun loo jarabariyo jaalle wada dhaarsan
Kun juubaha halgaadiyo warmaha kuman juqaaleeye
Kuman xalane lagu soo jabshoo wada jamaahiira ah
Kun tacliinta jiitoo cilmiga meel sare jooga
Kuman shaqadu waa kala jirtaa nabadda jeedaasha
Kun la jaqayo kun jeeniga ku sida hooyo jiidh adag leh
Kun jarmaada kuman hilib jara suuqa kuman jooga
Kun jalaato gada baalashlaha jaadka
Kuman cayrsha dilaal xariggu qoorta ugu jiro
Darawal jiinbaarsan kun jaamci ah
Kun muusiqa jimcaha jaanta ka ciyaara
Kun shallaadka qaatiyo dikriga kuman xadra e jeeban
Kun farsamada laga soo jirshoo biraha jeexjeexa
Kun Jannnaale beeraha jafiyo Jilib kuwaa haysta
Intaas oo kun oo wada jirtoo dhinac ka soo jeeda
Halka ay ku jeestaan ma karo cadawga joogaaye
Ceeriinka nimankaa jaqaa jaanta sii rogane
Jigjigga iyo ilaa Adari bay jagacda sii hayne
Jeexyada Wardheer qaar halkaa haadda loo jarine
Markaasaa dadkii luunku jaray uu jir roob degiye
Jirabkiyo dhibtii bay ka bixin jeelki gaalada e
Markaasaa farxadi waa jannee jiib naloo tumiye
Calankeena aan jecelnahaa jawhar sii noqone
Dadkaa abaaruhu jareen xaasaskaa jilicsan
Markii saaka joof lagu furiyo webiga jiinkiisa
Isticmaar jawaabtuu sugaa waa jug qaraxeede
Ninkay nabaddu jeedaan u tahay hayska xulo jiide
Inksatoo dhaqaalaha jiraa jiil yar yahay maanta
Qoonkii Illaahay la jiro maalintii jiganta
Jirabaada waa kuwa ka baxa juubajuubaha e
Ilaad aragto jaar kuu qosloon jiidhka kala haysan
Calankii shisheeyaha jirsaday jaalle lagu waaye
Aan ku jimicsanee maan jihaad jeeniga u qaadno.

*WAA CAJABE SHEEGA*

— Gabaygan la yaab ka leh waxaa tiriyey nin la oran jirey Xaaji Gooni, oo noolaa waqtigii Sayid Maxamed Cabdulle Xasan. Gabaygiisanna waxa ka jawaabay Sayidka. Xaaji Gooni gabygiisa wuxuu ku bilaabay:

*Rag cayaayir iyo maanso waa camaladiisiiye*
*Caynanka anigow hayiyo celiyihiisiiye*
*Kol haddaan calaqo looma furo cagaha dheeldheele*
*Lix iyo toban halaan soo cayimay caynka ka higgaadsha*
*Weel caanihii laga dhamee canuggu heemaarshey*
*Oo ciida loo dhigay afkii laga casheynaayey*
*Oo dhayi caaddaa ka tahay waa cajabe sheega?*

*Ceesaamo kuu dhalahayaan dhiilo loo culannin*
*Oo naaso cayntood lahayn waa cajabe sheega?*

*Cariish meel ku yaal oo aroos loo calaamadiyay*
*Oo aadan cimrigii daawanayn waa cajabe sheega?*

*Ceel buuxa aan laga cabayn cidina kuu diidin*
*Oo maaxi caadaa ka tahay calowna keenaaye*
*Oo maalka calaf looga shubin waa cajabe sheega?*

*Calaf aan laguu qorin asaad cunni aroor noolba*
*Aan caato iyo gaajo bi'in cawro waysaga e*
*Oo aanad cayaar uga dhergeyn waa cajabe sheega?*

*Cad baruur leh caysh iyo bariis caawa lagu siiyay*
*Aad caafimaad iyo kalgacal calalisoo laysay*
*Oo aadan cayaar caweysimi karayn waa cajabe sheega?*

*Caal weyn lo'aad iyo libaax, caranayoo jooga*
*Oo xeero ciriiriya ku jira caabuqna isyeelin*
*Aan xoola looga cabsanayn waa cajabe sheega?*

*Waxaad cunni asaan Eebahay kaaga calaf yeelin*
*Oo aadan cayaar kaga dhergeyn waa cajabe sheega?*



*Cir onkaday hillaac laga cabsaday karar cabaadaysa*
*Oo rays cirbaha laga dhigayn waa cajabe sheega?*

*Waxaan caradhuubyadu dhex marin calalna jeexaaya*
*Aan ciiska waran lagu karayn waa cajabe sheega?*

*Caqiido naagaan lagu guursanoo cawda kuu gogosha*
*Aadan cadaab kaga baqayn waa cajabe sheega????*

*Caday waxaad ku laysiyo ulaad caro u soo tuurtay*
*Oo aadan dad kaga ciil baxayn waa cajabe sheega?*

*Cawshiyo biciidkaa arlada cararayee jooga*
*In kastoo ciriid iyo kulayl lagu cisaareeyo*
*Calooshooda oon lama gashee waa cajabe sheega?*

*Waxaan caga lahyn oo kacayn sida curyaan naafo*
*Oo samada hoos kaga calaqan waa cajabe sheega?*

*MAGACAAGU YUU NOQON*

*Gabaygan gaaban waxaa tiriyey abwaan Ibraahim Gadhle, wuxuuna ku bilaabay:*

*Magacaagu yuu noqon mid xumaan ka marakaca*
*Sida macawisaha qaar nin ba maalin yuu xidhan*
*Hadba ki muraada le hawga dhigin maqaar saar*
*Mar waxaad dhadhamisiyo majin qaad ah haw dhiman*
*Hana talin masuubiyo wax makhluuqa kala dila*
*Maskaxdaadu yay noqn maqal lagula leeyahay*
*Yaan toban muftaax iyo lagu furan masaamiir*
*Waxaad shalayto mudatiyo mahadhada xusuusnow.*



*SAADAAL*

*Qaasim gabaygan waxa uu tiriyey 1968kii, mar uu maamulkii waqtigaas aad u dhaliilay. Waxa uuna ku hal qabsaday nin ay aad u saaxiibo ahaayeen oo ka tirsanaa ciidamada Booliska Soomaaliyeed oo ayaamahaas caddaalad-darro tirsanayey, aadna calool xumo weyn u qabay; waxa uuna yidhi:*

*Cashadii gashaba waagu waa caynad gooniyahe*
*Cadceed soo baxdaba noole wuu ku cibro qaataaye*
*Xiddigaha casaadiyo dayaxa caadka lagu meershay*
*Caamadu waxay moodayaan curasho dayreede*
*Anigaasa moorada cakiran kuu caddayn kara e*
*Cilmi felegga way garan raggii caalinka ahaaye*
*Cirsan yeedhkii caawana war buu sheegay Caliyowe*
*Wuxuu yidhi halkuu ku cuyubnaa cirkii soo dhaafye*
*Caawaa la kala soocayaa caabud iyo gaale*
*Carruuraha la dhacay awliyada laga cadheysiiyey*
*Carshigaaba laga soo aqbalay cabashadoodiiye*
*Waa cidhib go' duulkii shacbiga cunay wixiisiiye*
*Casha aan fogeyn wax isbeddeli ciidan fara weyne*
*Caaddaa rag korey buu nabsigu hoos u soo celine*
*Caanuhuba dhawaan way ka quban ciil daro loo qabo e*
*Inay curaddo kheyr lihi kacaan ciiddan la arkaaye*
*Caynkay maluugtu u egtahay cigay dadweynihiiye*
*Ceeryaamo subaxeed nin moogi, cadarka roob moodye*
*Marse haddii cadceed lagu dhexdaro wayska cidinciide*
*Caloolyow aan kugu raagi hayn ciidda how qodine*
*Cagta ii dhig waa kaa nabsigii soo cadceedsadaye.*

## *HADDI DUNIDA LAGU WAARAYO*

*Abwaan gabayaa ahaa oo ku magac dheeraa Ina Cabdille Muuse, lana oran jirey Yuusuf Cabdulle Muuse ayaa gabaygan curiyey. Yuusuf markii uu arkay in uu da' noqday ayaa waaya-aragnimadiisa in uu raad ka tago oo dadka uu la sii dardaarmo. Waxaanu dadka kala sii dardaarmayey waxyaabo nolosha habboon ee dunida la xidhiidha. Waxa uu yiri:*

*Haddii dunida lagu waarayooy daayin noqonayso*
*Waxaan laga dileen Nedbiyadii laysu soo diraye*
*Asaxaabihii baan degeen daahirka ahaaye*
*Faadumo iyo dirkeedee ayaan dumug yidhaahdeene*
*Daahaa ku noolaan lahaa degalladoodiiye*
*Anse waxaan daliishaday inaan lagu dambaynayne*
*Dawiilka uun baan arkiye diray arwaaxdiiye*
*Durdurkii Makkaad iyo Xajkaan daalib leeyahaye*
*Deeblahabkaan geela iyo adhigu waa daleel madhane*
*Daaraha la wareerayaa waa adduun dumaye*
*U dadaala diintiyo waqtiga daacadna ahaada*
*Cabdallaha dushiisiyo ayuu dayro kala sheegan*
*Darkii odayadii hore xidheen dalawgu yuu goynin*
*Doqon xaaja waa kaa dilaa dibaddaba u tuura*
*Shisheeyuhu hadduu idin danqaro dogob u nooleeya*
*Rag i daaya kaagama tage dab u fagaareeya*
*Meeshii daleelaa muskaba baahalku doontaaye*
*Duldhabaha wax loo saarayaa yaan dugaag marine*
*Is dugsada walaal kala durkaa dagan dharaartaase*
*Anna duulka aan celinayo iyo daadka aan moosi*
*Dal shisheeye waagaan tagee idinka duukeeyo*
*Amase mowdku igu soo dagee dabaqa lay saaro*
*Dadabtiyo aloolkaan ahaa dib u shallaytooda.*



## *QADHAADH IYO MACAAN*

*Gabaygan waxaa tiriyey Axmed Ismaaciil Diiriye "Qaasim", mar la warsaday inuu isa sheego, wuxuu yidhi:*

*Dacartuba mar bay malab dhashaa, aad muudsataa dhabaqe*
*Waxaan ahay macaan iyo qadhaadh, meel ku wada yaalle*
*Midigtayda iyo bidixdu waa laba mataanoode*
*Midi waa martida soora iyo, maata daadihise*
*Midina waa mindiyo xiiraiyo, mur iyo deebaaqe*
*Masalooyin talantaalyiaan, maandhow leeyahaye*
*Nin majiro keliyuun qabsaday, hay malaynnina e*
*Mar baan ahay muftiga saahidnimo, mawlaca u galaye*
*Marna makhaawi waashoo xumaa, miista baan ahaye*
*Mar baan ahay murtiyo baanisabo, madaxda reeraaye*
*Ay weliba muuniyo dulqaad, igu majeertaane*
*Marna reer-magaal loofaaroon, muuqan baan ahaye*
*Mar baan ahay nin xaaraan maqcada, marin jidiinkiiye*
*Marna tuug mu'diya baan ahoon, maal Rasuul bixinne*
*Mar baan ahay maqaan awliyada maqddin koodiiye*
*Marna mudanta shaydaanka iyo, maal jin baan ahaye*
*Miisaanna ima saari karo, nin i maleeyaaye*
*Waxaan ahay nin midabbaynayoo, maalinba is-roga e*
*Muuqaygu gelinkiiba, waa muunad gooniyahe*
*Muslinka iyo gaalada dirkaba, waan macne aqaane*
*Malaa'igta naartiyo jannadu, waygu murantaaye*
*Nin intaasoo mahadhooyin, loo mooggan baan ahaye*
*Ninkiise maalmo badan soo jiree, madaxu boosaystay*
*Ama inuun rag miisaami jirey, wuu i maan garanne*
*Nin kastoo halkii kuu macaan oo, ay muuqato laabtaadu*
*Ama aadan madaddaaladeeda, igala maarnaynin*
*Iska soo mar waa kuu bannaan, marinkaad doontaaye.*

## *REERKII CEEL UMA QODNEE*

*Waxa uu heeskani ka mid yahay heesaha lagu tiriyey xaaladda qallafsan ee Siyaasadda Somaaliya, waxaan ereyada sameeyey abwaankii Axmed-Nuur Yuusuf, wuxuuna ku bilaabay:*

*Qumanow qowlkii Ilaah*
*Qur'aanka waxaa laga akhriyey*
*Waxaan ruuxna u qorrayn*
*Ogow quwad kuma helee.*

*Haddaan qalinsaarashada*
*Tixraac ka soo qabsado*
*Qaadirkii na abuuray iyo*
*Soomaalidan qulubsane*
*Is wada qoyr goynaysa*
*Dhibaatada ay qabaan*
*Adaa wax ka qaban karee*
*Qareen u ah qolo kastee*
*Qalboobtan ka oogan iyo*
*Dabkan qarxayee ku jira*
*Qaboojin karaaya ee*
*Adigu say ku quman tahay*
*Jiridda qaranimada iyo*
*Midnimadayadanba qabo.*

*Waqtigu waa qaraf baxoo*
*Duulbuu qabsadoo gubee*
*kul baa cimilada qabtoo*
*Ciilbaa qoonkayaga hayee*
*Aroorkii loo qalqaday*
*Markii qorshayaal la dhigay*
*Ceelalyay isqabatayoo*
*Darkaa laga qayliyoo*
*Beeshii waa isqoonsatee*
*Reerkii ceel uma qodnee*
*Allow qiil bixiya keen.*



*Qiyaasta sida muuqatana*
*Ma qumana duulkuyoo*
*Qab dhaqan-guuraanimaa*
*Qalbiga uga buuxa oo*
*Qawaaniin dawladnimo*
*Qolana ma danayso oo*
*Cilmigu qiime kuma lahoo*
*Xaqii qarqarsuu yahoo*
*Qabiilooyin loolamiyo*
*Qolaa sed bursiin rabtoo*
*Quud baa qaar loo badshaa*
*Dab lagu kala qaadayoo*
*Meel hadal wax ka qaban karaan*
*Dagaal ku garqaybsannaa*
*Dad qiime leh naga dhintaan*
*Markii qallac nagu dhacaan*
*Colaad la qaylo-dhaaminnaa*
*Baroordiiq la qowqabnee*
*Qisadayadu yaab lahoo*
*Qabaal baa kala jabiyo*
*Quddaa biyo daadiyaa*
*Qalloocu ka billowdayoo*
*Nabaddii waa la qasayoo*
*Wanaag waa qalfoof dumoo*
*Col baa loo qalab gurtoo*
*Qoob baa la qarjoogsadee*
*Nin belo qabanqaabiyaa*
*Macaanka ma quuta'oo*
*Ba'baa qoorta ugu jiree*
*Maxaa qabqabdhaafkii taray?*

# *SUUGAANTA SOOMAALIDA*

*Suugaanta Soomaalidu waxa ay had iyo jeer la qoob wadaagi jirtey heererka nolosha, xilliga, iyo hadba wixii kale ee ummadda guud ahaan ama qayb ka mid ah, gaar ahaan ula soo gudboonaada. Wanaagga, xumaanta, nabadda, colaadda, jacaylka, dardaaranka, waanada iyo kaftankaba waxa aynu arkaynaa inay Soomaalidu ka gabyi jirtey. Ammaanta geela, gammaanka iyo gabdhuhu waxa ay ahaan jirtay qodobbada suugaantu ugu badnaan jirtey.*

*Shisheeyuhu markii uu dalka Soomaaliyeed gacanta ku dhigay, ayaa uu hadba qodob cusub oo aad qiime weyn u lihi suugaantii ku soo qordhay. Qodobkaas oo ahaa siyaasadda ama waddaniyadda. Raggii qodobkaas isaga ah bilaabay, waxa calanka u sida Sayid Maxamed Cabdulle Xasan, oo kumanyaal tixood ka tiriyey. Sayidkii dadka Soomaaliyeed waxa uu uga tagey, gabay dardaaran ahaa, oo ilaa hadda lagu daydo, iyada oo ilaa iyo maalintii Sayidku xijaabtey si dhab ah loo ogaaday, in gumeystaha lala doodi karo, loo gabyi karo, marka ay ka fursan weydana lala dagaallami karo.*

*Waxa ay ahayd dagaalkii labaad ee adduun-weynaha dhexdiisii markii ay rag dhawr nin ah oo Soomaaliyeed, gumeysiga runta u dhiibeen. Raggaas oo ay ka mid ahaayeen Cabdi Gahayr iyo nin ina Nuur Laangadhe la odhan jirey oo ilaa iyo hadda nool. Cabdi Gahayr waxa uu isaga iyo afadiisii oo siyaakhad weydisatey la hadlaya sannadkii 1940kii yidhi:*

1. *Ina Cumar Qadhoone adduun qalle bixi waaye*
2. *Qasnadaha raggii keydsan jirey qaar baa tuugsadee*
3. *Ingriisba laga qaad dhulkuu qaybta ku lahaaye*
4. *Qarka wuxuu la meer meerayaa waa nin soo qaxaye*
5. *Dayuuraduhu waa qayla doon qoorta marayaa e*
6. *Khoorigii "Suweys" maylashii kama qamaadaane*
7. *Adigaaba qalab doonay quusey Faransiise.*

*Gabaygan oo uu Cabdi Gahayr inuu afadiisa waxyaalaha adduunka ka dhacayey ugaga warramo ula qabsaday, wuxuu run ahaantii noqday gantaal gumeystayaaha laabta ka abaaray. Dadka Soomaaliyeed oo Ingiriiska iyo Faransiiska xoogag waaweyn oo aan af iyo gacan toona lagaga guuleysan karin u haystaybaa markiiba gabaygaasu siduu Ingiriiska u taabtay waxaa ina tusaysa daawashadii Ingriisku Cabdi Gahayr Masar ku geeyey si uu inay Kinaalkii Suweys haystaan u soo tuso.*



*Geeraarka soo socda waxaa sannadkii 1943kii curiyey nin gabayaa ahaa oo Maxamed Nuur Laangadhe la odhan jirey. Maxamed Nuur waxaa la weydiistey inuu "Raadiyaha Hargeysa", gabay uu libihii dagaalkii ku ammaanayo ka tiriyo. Isla markaasna uu Jarmalka iyo saaxiibadii ku ceebeeyeo. Maxamed taas wuu diidey, wuxuuna isaga oo geesinnimo hadlayey, runna sheegayey, yidhi:*

*Mar haddaan gurigayga*
*Gidhli gaanka gariiriyo*
*Garnayl loo lala tegeynin*
*Iglan baa gubaneysa*
*Maxaa iiga gidhiisha*

*Gudaha ceelka Hargeysa*
*Weligey gees uma dhaafine*
*Bal maxaan laba gaal*
*Oo abtirsiima gudboon*
*Midkood aan gumeen*
*Midna guusha u siinoo*
*Aniga iiga gidhiisa ah*

*Gudaha ceelka Hargeysa*
*Weligey gees uma dhaafin*
*Inta aan waxa gasiintiyo*
*Inta aan gaajo ku seexday*
*Haddii aan isu geeyo*
*Malaha waa isku gaw e*
*Mar haddaan ka gabayey oon*
*Go'aygiina ka qaatay*
*Maxaa iiga gidhiisha*

*Baro macnaha erayadan cusub:*

| | |
|---|---|
| *Qoobwadaag:* | *la socod* |
| *Xijaabtey:* | *dhintey* |
| *Siyaakhad:* | *qalabka dumarku xidho* |
| *Qaalle bixwaa:* | *Dhibaato beeli waa* |
| *Qarka:* | *dibadda* |
| *Maylaashii:* | *maraakibtii* |
| *Abaartay:* | *ku dhacday* |
| *Gidhi gaan:* | *bunduqa weyn, hub culus* |
| *Garneyl:* | *nooc kale oo hubka ka mid ah (Hand garanade)* |
| *Maxaa iga gidhiisha:* | *maxaa iga galay, maxaa iiga jira?* |
| *Gasiintey:* | *cuney, quutey* |
| *Isku gaw:* | *isla eg yihiin* |